**Sharci lamba. 28 ee 30 Oktoobre 1964**

**Meelmarinta iyo fulinta heshiisyada soo socda, ee dhexmaray Soomaaliya iyo Itaalya: 1) Mucaahadada saaxiibtinimada, oo ay raacsan yihiin waraaqaha la is-dhaafsaday; 2) Heshiis qunsuliyadeed; 3) Mucaahado ganacsiyeed, ee bixin iyo iskaashi dhaqaale iyo farsamo, oo ay raacsan yihiin qoraallo isdhaafsi wargelin; 4) Mucaahado xagga adeegyada diyaaradeed; 5) Mucaahado xagga lacagaha iyo isdhaafiga qoraallada la xiriira; 6) Mucaahado xagga nidaamka guud, ee danaha mooska la xiriira; 7) Mucaahado xagga iskaashiga farsamo; 8) Mucaahado xagga dhaqanka.**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Markuu arkay oggolaanshaha Golaha Qaranka;

**WAXAA UU SAXIIXAYAA**

Sharciga soo socda:

**Qod. 1**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda waxa uu u idman yahay in uu meelmariyo Mucaahadooyinka soo socda. ee dhexmaray Soomaaliya iyo Itaaliya:

1) Mucaahado saaxiibtinimo, oo lagu saxiixay Muqdisho 1da Luulyo 1960, oo la raaciyey isdhaafsiga aqbalaadda mucaahadada, oo ku taariikh ah; oo ay raacsan yihiin qoraallada is-dhaafsiga aqbalaadda mucaahadada, oo ku taariikh ah;
2) heshiis caalami ah, ee qunsuliyadeed, oo lagu saxiixay Muqdisho 1da Luulyo 1960;
3) Mucaahado ganacsi, bixin iyo iskaashi dhaqaale iyo farsamo, oo lagu saxiixay Muqdisho 1da Luulyo 1960, oo ay raacsan yihiin qoraallo isdhaafsi aqbalaad mucaahado, oo ku taariikh ah;
4) Mucaahado ku saabsan adeegyada diyaaradaha, oo lagu saxiixay Muqdisho 1da Luulyo 1960;
5) Mucaahado lacageed, oo lagu saxiixay Roma 23 Disember 1960, oo ay raacsan yihiin qoraallo isdhaafsi aqbalaad mucaahado, oo lagu sameeyey Muqdisho 1da Luulyo 1960;
6) Mucaahado xagga nidaamka guud, ee danaha xagga mooska (mooseed), oo lagu saxiixay Roma 23 November 1960, oo ay raacsan yihiin qoraallo isdhaafsi aqbalaad mucaahado, oo ku taariikh ah;
7) Mucaahado iskaashi farsamo, oo lagu saxiixay Roma 26 Abriil 1961;
8) Mucaahado dhaqan, oo lagu saxiixay Roma 26 Abriil 1961.

**Qod. 2**

Axkaamta mucaahadooyin horey loo soo sheegay waxa ay yeelanayaan awood sharci, sida uu dhigayo qodobka 6, faqradda kowaad, ee Dastuurka, laga bilaabo dhaqangalkooda, sí waafaqsan waxa ay farayaan mid kasta oo ayagaas ka mid ah.

**Qod. 3**

Bankiga Qaranka soomaaliyeed waxa uu u idman yahay, xataa wax ka baxsan axkaamta sharciga iyo xeerhoosaadka, in uu Dawladda siiyo deyn aan dul-saar lahayn, ee muddadeedu aysan ka yareyn labaatan sano iyo qaddar aan ka badnayn saddex milyan oo Shilin Soomaali ah,

iyadoo lagu xisaabinayo tabarucaadka gaarka ah ee uu siiyey Sanduuqa Wareegga Lacagta ee Soomaaliya iyadoo la raacayo qodobka 2aad ee Heshiiskii Lacagta ee lagu saxiixay Rome bishii Nofembar 23 1960.

Sharcigan waxaa la gelinayaa Uruurinta Rasmiga ah, ee Sharciyada, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, taariikhda 30 Oktoobre 1961.

Madaxweynaha

**Mudane Aadan Cabdulle Cusmaan**

Wasiirka Kowaad

**Cabdirashiid Cali Sharmaake**

**MUCAAHADO SAAXIIBTINIMO EE KA DHEXEYSA SOOMAALIYA IYO ITAALYA**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA TALYAANIGA IYO MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA, ayaga oo uu dhaqaajinayo rabitaanka ay wadaagaan, ee sugidda iyo adkeynta xiriirka saaxiibtinimo, ee mideynaya shacaka talyaaniga iyo shacabka soomaaliyeed, waxa ay góaansadeen in ay saxiixaan Mucaahado saaxiibtinimo.
Sidaas drateed waxa ay wakiilladooda oo awood buuxa leh u igmadeen:

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA TALYAANIGA Mudane Carlo Russo

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA Mudane Dr. Maxamed Shekh Maxamuud Gabyow

Kuwaas oo, ka dib markii ay isdhaafsadeen awoodahooda buuxa, oo lahahaa qaabkii wanaagsan oo habboonaa, waxa ay ku heshiiyeen qodobbadaa soo socda:

**Qod. 1**

Waxaa jiraya nabad laguma xadgudbaan iyo joogto ah iyo saaxiibtimo dhab ah, ee u dhexeysa, Jamhuuriyaada Talyaaniga iyo Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**Qod. 2**

Dhnacyada sare, ee mucaahadada, ayaga oo ka shidaal-qaadanaya mabaaida mabaadi'da uu qeexayo Axdiga Qaramada Midoobay, waxay caddeynayaan u hoggaansanaantooda buuxda iyo sida firfircoonida leh oo ay u raacsan yihiin himilooyinka Ururkaas, gaar ahaan xagga wixiiku saabsan adkeynta nabadda guud iyo xoojinta iskaashiga caalamiga ah.

**Qod. 3**

Mid kasta oo ka mid ah dhinacyada sare, ee mucaahadada, waxa uu dhulka dhinaca kale ka sameysan karaa metalaad diblomaasiyadeed iyada oo derejo Safaarad.

Mid kasta oo ka mida dhinacyada Sare waxay dhulka dhinaca kale waxa uu ka sameysan karaa xafiis qunsuliyadeed.

**Qod. 4**

Ayada oo had jeer looga golleeyaha, in sí joogto ah loo kafaala-qaado isweydaarsiga iskaashiga caalamiga ah ee heer caalami, xukuumadahadhinacyasa Sase, ee Mucaahadada, waxa ay yelanayaa xiriir dhow, ayaga oo isdhaafsi macluumaad iyo wada-tashiyo ka yeelanaya dhammaan arrimaha u wada danta ah.

**Qod. 5**

Muwaadiniinta dal kasta waxaa lagu dammaanad qaadayaa, dhulka dhinaca kale gudahiisa, ilaalin iyo amni dad ahaantooda iyo hantidooda waxaana loo xaqiijin doona isla xuquuqda, mudnaanta iyo mucaamalada ay ku naalloodaan, xuduudda shuruucda gudahooda, muwaadiniinta dalka kale.

**Qod. 6**

Mucaahadadan waa la meelmarin doonaa waxa ayna dhaqan gelaysaa maalinta isdhaafsiga qoraallada ansixinta ee ka dhici doona Roma sida ugu dhaqsiyaha badan.

Wakiillada dhinacyada Sare, ee haysta awoodahooda buuxa, waxa ay saxiixeen Mucaadadan, waxayna saareen shaabbadahooda.
Waxaa lagu sameeyey Muqdisho, 1dii Luulyo 1960.

Jamhuuriyadda Talyaaniga waxaa u saxiixay
**Carlo Russo**

Jamhuuriyadda Soomaaliya waxaa u saxiixay
**Maxamed S. Gabyow**

## MUCAAHADOOYIN WADAR-DHINACLE OO WADA GALEEN XUKUUMADDA TALYAANIGA EE LOO FIDIYEY SOOMAALIYA

— 30 Sebtember 1821 – Ginevra, Heshiis caalami ah, ee la dagaallanka boobka afduubka, ee haweenka iyo carruurta yaryar;
— 12 Sebtember 1923 – – Ginevra, Heshiis caalami ah eek u saabsan la dagaallanka nashrinta iyo ka-ganacsiga sawirrada anshax-xumida ah;
— 10 Abriil 1926 – Bruksel, Heshiis Caalamga ah eek u saabdan mideynta qaar ka mida axkaamta la xiriirta xasaanadda maraakiibta Dawladda;
— 21 Juunyo 1926 Paris, Heshiis caafimaad ee ku saabsan ilaalinta lidka ku ah cudurrada faafa;
— 25 Sebtember 1926 – Jinefra, Heshiis caalami ah, ee la xiriira xagga addoonsiga;
— 7 Juun 1930 – Jinefra, Heshiis caalami ah, ee xagga mideynta sharciga sarrifka lacagaha:
A) Heshiis caalami ah ee ku saabsan sharciga Boollada, ee la dul saarayo kambiyaalaha iyo waraaqda bankiga ee lagu xawilo lacagaha iyo diwaan raacsan;
B) Heshiis caalami ah, ee la xiriira, eek u taxaluqasharciga qaabka mideysan, ee kambiyaalaha iyo waraaqda bankiga ee lagu xawilo lacagaha oo ay raacsan yhiin diwaan iyo lifaaqyo;
C) Heshiis caalami ah, ee ku taxaluqa xagga in la nidaamiyoqaar ka mida isqabadyada sharciyada, ee la xiriira xagga arrimaha kambiyaalaha iyo waraaqaha bankiga, ee lagu xawilo lacagaha iyo diiwaan raacsan;
— 19 Maarso 1931 – Jinefra, Heshiis caalami ah, ee xagga mideynta shaarciyada sarrifka lacagaha:
A) Heshiis caalami ah, ee xambaarsan sharciga qaabka israacsan, eek u taxaluqa jeegagga bankiyeed;
B) Heshiis caalami ah oo loola jeedo in lagu nidaamiyo qaar ka mid ah isqabadyada ka yimaada xagga arrimaha jeegagga bankiyeed;
C) Heshiis caalami ah, ee la xiriira sharciga boollada, ee xagga arrimaha jeegagga bankiyeed.
— 13 Luulyo 1931 – Jinefra, Heshiis caalami ah, eek u saabsan xagga in la xadeeyo sameynta iyo in nidaamiyo qaybinta mukhaadaraadka;
— 12 Abriil 1933 – Aaya, Heshiis caami ah, ee xagga caafimaadka, ee ku taxaluqa duulimaadka hawada;
— 11 Oktobar 1933 – Jinefra, Heshiis caalami ah, ee xagga fududeynta wareegga caalamiga ah,ee filimada leh dabeecad tarbiyadeed (tacliimeed);

— 29 Maajo 1933 – Roma, Heshiis caalami ah, ee loola jeedo mideynta qaar ka mida axkaam ku saabsan xajsinta ka hortagga ah, ee dayaaradaha;
— 24 Maajo 1934 – Bruksel, diiwaanka dheeriga ah, ee raacsan Heshiixka caalamiga ah, ee xagga mideynta qaar ka mid ah axkaamta ku saabsan xasaanadda maraakiibta Dawladda, oo lagu saxiixay Bruksel 10^kii Abriil 1926;
— 22 Disember 1934 – Baariis, Mucaahadooyin caalami ah, eek u saabsan: A) baabi'inta saxiixa tasdiiqinta qunsuliyadeed ee la saaro buugga caafimaadka; B) baabi'inta buugga caafimaadka;
— 31 Oktoobar 1938 – Baariis, Heshiis caalami ah, oo ujeeddadiisu tahay wax-ka-beddelka Heshiiska caalamiga ah, ee ku saabsan xagga caafimaadka caalamiga, ee 21 Juunyo 1926.

**Muqdisho, 1^da Luulyo 1960**

**Mudane,**

Ayada oo la tixraacayo Mucaahadada saaxiibtinimo, oo ay manta oo ay taariikhdu tahay kala saxiixdeen labadeenna waddan, madane,waxaa sharaf ii ahin aan kagu wargeliyo arrimaha soo socda:

1) Waxaan isku ognahay, mar allaale marka ay dhaqangasho Macaahadada kor lagu soo tilmaamay, Xukuumadda soomaaliyeed waxa ay Xukuumadda talyaaniga kala wareegeysaa dhammaan xuquuqda iyo fulinta ballanqaadyada ka dhasha heshiisyada caalamiga oo Xukuumadda talyaaniga ku gashay sifaheeda sifaheeda Hayadda madaxa ka ah maamulka wasaayadda,ayada oo ku hadleysa magaca iyo danaha Soomaaliya ilaa laga gaaro 30^ka Juun 1960;
2) Xagga ujeeddooyinka iyo xuuraxa qodobka 12, ee Mucaahadada wasaayadda, ee dhulka Soomaaliya oo marka laga bilaabo taariikhda 27^kaJannaayo 1950, Xukuumadda Talyaanigawaxa ay u haysataa in uu waajibkeedu yahay in ay siiso liiska mucaahadooyinka wadar-dhinaclaha oo ay gashay Itaalya wixii ka horreeyey 1950, ayada oo loo fidinaayo Soomaaliya, xagga wixii ku saabsan arrimaha baniiadamnimo, busho, caafimaad. Sharci iyo farsamo-maamul intaba.

Marka ay soomaaliya qaadato xurriyadda waxaa dhammaanaya masuuliyad iyo waajib kasta oo ay Xukuumadda talyaanigaku qaadday mucaahadooyinkaas – xagga wixii ku saabsan u fididda (ku wareegidda) mucaahadooyinkaas dhanka Soomaaliya – ha haato xagga Xukuumadda Soomaaliya ama ha ahaato xagga dawladaha saddexaad.

Qoraalkan gaaban, liiska la socda iyo jawaabta kasta oo aad mudane dootid in aad I soo gaarsiisid, xagga arrimahan, waxa ay guntayaan ama noqonayaan heshiis ka dhexeeya labadeenna xukumadood, waxayna noqonayaan qayb ka mida oo aan ka go'I Karin Mucaahadada kor lagu soo raad-raacay.

Waxaa fursad fiican ii ah, Mudane, in aan mudane kuu cusbooneysiiyo qaddarin tan ugu sarreysa.

Maxada Wefdiga Soomaaliya
**Mudane Dr. Maxamed Sheekh Maxamuud Gabyow**

Mudane Xil. Qareen **Carlo Russo**
Madaxa Wefdiga Talyaaniga

**HESHIISKA QUSULIYADAHA, EE KA DHEXEEYA ITALIYA IYO SOOMAALIYA**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga iyo Madaxweynaha Jamhuuriyya Soomaaliya, ayaga oo uu dhaqaajinayo rabitaan ah in ay caadi ka dhigaan maqaamka qunsulka mid kasta oo ka mida dhinayada Sare, ee heshiiska, ee loo xilsaaray in ay xilalkooda ka gutaan midba dhulka kan kale, waxa ay go'aansadeen in ay wada galaan Heshiis qunsuliyadeed. Sidaas darted waxa ay wakiilladooda awoodda buuxda leh ahaan u igmadeen:**
**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA TALYAANIGA Mudane Xildhibaan Qareen Carlo Russo**
**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA Mudane Xil. Dr Maxamed Shekhh Maxamuud Gabyow**

**Kuwaas oo, ka dib markii ay isdhaafsadeen caddeymaha awoodahooda buuxa, ee lahaa qaabkii iyo nuxurkii lagu yaqqiin, waxa ay ku heshiiyeen arrimaha soo socda:**

## CINWAANKA 1AAD

Qeexitaan – Abuuritaanka Xafiiyada Qunsuliyadeed iyo Magacaabista Qunsullada

**Qodobka 1aad.** – Marka la eego saameynta Heshiiskan, ereyada iyo oraahyada waxa ay kala leeyihiin macnooyinka soo socda:

- Dawladda dirtada ah waxaa loola jeedaa dhinaca Sare ee magacaaba qunsulka;
- dawladda degaan-hawleedka, waxaa loola jeedaa dhinaca Sare, ee uu dhulkiisa, qunsulku ku fulinayo xilalkiisa;
- Xafiis qunsuliyadeed, waxaa loola jeedaa xafiis kasta oo loo abuuray (dhisay) in uu hawlo qunsuliyadeed ka fuliyo, micnaha: Qunsuliyad Guud, qunsuliyad, Ku-xigeen qunsuliyad, wakiillo qunsuliyadeed, iyo haddii loo baahdo diiwaanhaye qunsuliyadeed, ee Ergada Dibloomaasiyadeed;
- Xarumaha qunsuliyadaha, waxaa loola jeeda xafiis kasta ama qayb ka mida xafiis oo laga dhigay xarun xafiis qunsuliyadeed;

Qunsul xirfadeed, waxaa loola jeedaa hawlwadeenl kasta, ee Dawladda dirsatay oo ay middan dambe u magaacawda in uu gooni ahaan qabto xilal qunsuliyadeed, kuna qabto sife Qunsul Guud ama Ku-xigeen Qunsul;

- Hawlwadeen qunsuliyadeed, waxaa loola jeedaa qunsulka xirfadeed oo leh xafiis qunsuliyadeed ama hawlwadeenno kale, oo shaqaale joogto ah, ee ka tirsan qunsuliyaddaas oo u-qaybsan isla xafiiska in uu ka fuliyo hawlo (xilal) qunsuliyadeed;
- Qunsul sharafeed, waxaa loola jeedaa muwaadin kasta, Dawladda soo-dirtada ama Dawladda degaan-hawleedka, loo magacaabay, si' waafaqsan sharciyada Dawladda dirstada ah, si uu dhulka Dawladda degaan-hawleedka uga fuliyo hawlaha (xilalka) Qunsulka guud, Qunsul ama Ku-xigeen qunsul iyo in uu leeyahay awood ah in uu qaban karo hawlo kale, oo wax ka soo galaan;
- Wakiil qunsuliyadeed waxaa loola jeedaa, muwaadin kasta, ee Dawladda dirtada ama Dawladda degaan-hawleedka, ee uu wakiishay Qunsul xirfadeed madaxa ka ah xafiiska qunsuliyadeed, ee ku yaal Dawladda degaan-hawleedka, si uu u fuliyo hawlo( xilal)

qunsuliyadeed, uuna leeyahay awood uu ku qabsado xirfad hawleed ama si kastaba wax ka soo galaan (dakhli leh).

— Karaani Qunsuliyadeed waxaa loola jeedaa Qof kasta oo ah muwaadin ka soo jeeda Dawlad kasta ee u xilsaaran in uu qabto Xil Maamul Qunsuliyad, oo aan u idmaneyn in uu qabto shaqo Xirfadeed kale, ama uu ka soo galo dakhli.

**Qod. 2**

- Mid kasta oo ka mid ah dhinacyada sare ee heshiiska waxaa u bannaan, ka dib marka uu oggolaansho ka helo Dawladda Degaan-howleedka, in uu Qunsuliyado Guud, Qunsuliyado iyo Wakiilo Qunsuliyado ka sameysto magaalooyinka Dekadaha iyo goobaha dhinaca kale.

Qunsuliyadaha Guud iyo Qunsuliyadaha dhamaantood waa xafiisyo madaxbanaan. Ku-Xigeennada Qunsuliyadaha iyo wakiillada, inkasta oo ay yihiin xafiisyo Qunsuliyadeed oo iskood u taagan, waxa ay hoos yimaadaan, si waafaqsan shuruucda Dawladda soo dirsatay, hal Qunsuliyad Guud ama hal Qunsuliyad, Xarunta iyo Xeyndaabka dhuleed ee xafiis kasta oo qunsuliyadeed waxaa laga goyn doonaa heshiis ay dhinacyada sare wada geli doonaan.

**Qod. 3**

- Si uu u fuliyo howlo Qunsuliyadeed, mid kasta oo ka mid ah dhinacyada sare, ee heshiiska, waxaa uu magacaabi karaa Qunsullo Guud, Qunsullo iyo Ku-Xigeenno Qunsullo Xirfadeed, Wakiillo Qunsuliyadeed, Hawlwadeeno iyo Karaanniyo Qunsuliyadeed oo dhan hadba tirada ku filan xafiis kasta, ee Qunsuliyad.

Dadka habkaas loo magacaabay waxa ay yeelanayaan dhammaan wixii mudnaan iyo Qadarin ah oo ay aqoonsan yihiin shuruucda iyo dhaqamada caalamiga ah.

**Qod. 4**

- Hawlwadeennada Qunsuliyadeed, ee rasmiga ah, ee hal Qunsuliyadda Guud ama hal Qunsuliyad caadi ah ama hal Ku-xigeen Qunsuliyad waxaa qaabilaya oo aqoonsanaya Xukuumadda degaan-hawleedka, ayaga oo la xaadirinaya warqadahooda aqoonsi, oo ay ku cad yihiin xarunta iyo xeyndaab dhuleedka xafiisyada ay u magacaaban yihiin maamullada.

Oggolaansha in dadka kor ku xusan ay hawlo ka fuliyaan dalka, aqoonsiga kor ku xusan waxaa lagu bixinayaa lacag la'aan iyo dhaqsiyo, laakiin waa la diidi karaa, waana la-la noqon karaa sababo culus dartood.

Hawlwadeennada kale, ee Qunsuliyadaha waxay hawlahooda u idman yihiin, marka la gudbiyo magacaabistooda. Idinkaas (ruqsaddaas) lama diidi karo loo-lamana noqon karo wax aan sabab culus aheyn.

**Qod. 5**

Hawlwadeennada iyo Karraaniyaasha Qunsuliyadaha waxa ay hawlahooda u gudan karaan si ku meel gaar ah, sife sii-hayayaal, hawlaha Qunsulka ah madaxa xafiiska, ee geeriyooday ama hawsha uu qaban waayo cudur awgeed ama maqnaansho ama sabab kale awgeed, siihayayaashu, ka dib marka la wargeliyo madaxda maxaliga ah waxa ay gudanayaan hawlahooda kana faa'iidasanayaan axkaamta macaahadadan(heshiis), inta la dhawrayo in qofkii xilkaas lahaa uu dib u hawlgalo ama laga beddelo.

Siihayaha Xafiiska Qunsuliyadeed, maadaama uu xilkiisu ku-meel-gaar yahay, kama faa'iidaysan karo ka-dhaafidda canshuuraha caadiga ah iyo canshuuraha dekedda, wixii munaan

dheeri ah, ee ka ballaaran, kuwa marka la eego qodobbada mucaahadadan uu xaqa ugu leeyahay shaqadiisa hawlwadeen ama karani Qusuliyadeed.

**Qod. 6**

Hawlwadeennada Qunsuliyadeed oo sida rasmiga ugu magacaaban Qunsuliyad Guud waxa ay magacaabi karaan Ku-Xigeenno Qunsul sharfeed iyo wakiillo Qusuliyadeed ka hawgala magaalooyinka iyo meelo ka tirsan xeyndaabka dhulka ay u xilsaaran yihiin, ayada oo loo shardinayo oggolaansho xukumadda Dawladda degaan-hawleedkooda (deggan yihiin).

Ku-Xigeennada Qunsul sharafeedyada iyo wakiillada Qunsuliyadee waa in ay haystaan warqad ruqsad ah ee uu ujeedadaas u soo saaray Qunsulkii magacaabay oo ay hoos-taagaan(yimaadaan).

**Qod. 7**

Madaxda rasmiga ah, ee xafiis Qunsuliyad waa in ay madaxda dalka degaan-hawleedka ku wargeliyaan magacyada iyo cinwaanada hawlwadeennada iyo karraaniyaasha ka hoos shaqeeya.

## CINWAANKA 2AAD
Tixgelinno Dheeri ah iyo Xasaanad

**Qod. 8**

Dhinacyada Sare, ee Heshiiska, waxa ay sí xor ah, ayaga oo dhowraya shuruucda Dawladda degaan-hawleedkooda, gadan karaan, kireysan karaa ama ku haysan karaan qaab kale oo sharci ah guryo, lokaallo, iyo dhulal loo qoondeeyey in xarumo looga dhigo xafiisyada qunsulido ee ay kala leeyihiin, guryo ay degaan shaqaalaha qunsuliyadaha iyo meelo ay ku kulmaan jaaliyadaha muwaadiniinta ay isku waddanka ka soo jeedaan.

Dhismooyinka, qayb dhismooyinka ka mida iyo wixii raacsan iyo weliba dhulalka ku dheggan, oo ay leedahay Dawladda dirtada ah, oo sí gooni ah loogu talagalay in laga dhigo xarun qunsuliyad – kuwaas oo ay ku jiraan dhismooyinka degaanka u ah qunsulka, bishardi in ay niiban yihiin dhismooyinkaas – waa kuwo laga dhaafay canshuuraha caamka, canshuuraha la xiriira adeegyada ama canshuuraha dekadaha oo ay dabaqdo ama qaaddo Dawladda degaanka ay ka hawlgalaan, ee ku dhacaan maguurtooyinkaas iyo dakhliga ka soo xaasila. Canshuur-dhaafkaas loo lama jeedo in uu saameeyo canshuuraha dekadeed looga rabo khidmad la xiriirta adeeg loo sameeyey.

Qoraallada iyo heshiisyada, ee la xiriira gadashada ashyaa’da hantida, ee ku xusan Qodobka hore (la soo dhaafay) waa kuwo laga dhaafay canshuurta caamka, Canshuurta ku lammaansan adeegyadana ama tan dekadaha, nooc kasta oo ay yihiin.

**Qod. 9**

Hawlwadeennada Qunsuliyadaha, oo sida rasmiga ugu magacaaban xafiis Qunsuliyad waxa ay dhigi karaan, dibedda maguurtada xarunta u ah xafiiskaas, calaamad ay la socoto astaanta Dawladda dirtada ah (soo dirsada), iyo tilmaanta isla xafiiska, oo ku qoran afka rasmiga Dawladda la soo sheegay, ayagaas waxa ay sidaas oo kale, maalmaha maamuuska leh, iyo munaasabadaha dhaqan, calankooda Qaran dul saari karaan xafiiska, halka uu ku yaal xafiiska Qunsuliyadda iyo degaanka Qunsulka rasmiga dushiisa.

Kuwa rasmiga ah iyo sii-hayayaasha xafiiska Qunsuliyadda waxa ay ku gudajiraan gudaha xilalkooda(hawlahooda), in ay baabuurta, maraakiibta iyo diyaaradaha ay isticmaalayaan, calankooda Qaran.

Mid kasta oo ka mid ah dhinacyada sare, ee heshiiska waxa uu ixtiraam iyo ilaalin u xaqiijinayaa calanka iyo astaanta Qaran, ee dhinaca kale.

**Qod. 10**

Keydka, Qoraalada iyo diiwaannada Qunsuliyaha, meel kasta oo ay ku yaallaan waa laguma xadgudbaan, madaxda Dawladda degaan hawleedkana (Dawladda martida loo yahay) marnaba ma baari karaan mana xajsin karaan.

Keydadka, Qoraallada iyo diiwaannada Qunsuliyadaha waxaa lagu hayaa meel loogu talagalay oo ka mid ah dhismooyinka xarumaha u ah kana duwaan meelaha degaanada shaqaalaha hawlwadeennada, karaaniyada iyo wakiilada Qunsuliyadaha.

Hawlwadeennada Qunsuliyadaha waxa ay xaq u leeyihiin in ay si xor ah ula xiriiraan warqadana u qoraan, ayaga oo isticmaalaya xataa baaq sir ah, madaxda Xukuumaddooda iyo ergooyinka Diplomaasi oo ay hoos yimaadaan. Xaq la mid ah waxaa leh Qunsul sharafeedyada iyo wakiillada Qunsuliyadaha, xagga xiriirka ay la leeyihiin xafiiska Qunsuliyadda ay hoos yimaadaan, dhammaan warqadaha xafiisyada Qunsuliyadaha waa laguma xadgudbaan, waxaana lagu diri karaa kolayo, jawaanno ama xirmooyin kale oo lingaxan.

**Qod. 11**

Boliiska iyo madaxda Dawladda degaan-hawleedka (Dawladda martida loo yahay), ma geli karaan lokaalada (dhismooyinka) Qunsuliyadaha, mana fatashi karaan ayagoo aan heysan oggolaanshaha Qofka rasmi ahaan ugu magacaaban xafiiska.

Xasaanaddaas oo kale waxaa leh lokaalada hoyga gaarka u ah hawlwadeennada, wakiillada iyo karaaniyaasha Qunsuliyadaha.

Haddii ay jirto arrin degdeg ah, ee muuqata, oo ka dhalatay dab kacay ama musiibo kale, oggolaansho maxada xafiiska waxaa loo citiqaadayaa mid la haysto (ayada oo la heysto).

Hawlwadeennada, wakiilada, karaaniyaasha Qunsuliyadaha Dawladda dirtada ah, laguma sameyn karo la wareegid shakhsi ah iyo mid hanti guurto ah, nooc kasta oo ay tahay, lookaalada xafiisyada Qunsuliyadaha, hoyga (degaanka) hawlwadeennada Qusuliyadaha, wakiillada iyo karaaniyaasha, ee Dawladda dirtada (soo dirsatay) iyo weliba hantida guurtada ah ee taal lookaallada horey loo soo sheegay waxaa laga dhaafay talaabooyin la wareegid iyo in laga dhigo hoy militari ama taakuleyn la mid ah.

**Qod. 12**

Hawlwadeennada Qunsuliyaha waxa ay leeyihiin xasaanad shakhsi, sidaas darteed lama xiri karo, haddii aysan markaas dembi faraha kula jirin, lagulama kici karo tillaabooyin xarig ka hortag, haddii laga reebo marka uu ku eedeysan yahay dembi ciqaabtiisu tahay xarig aan ka yareyn saddex sano, marka la raaco sharciga Dawladda Deggaan-hawleedka.

Hawlwadeenada Qunsuliyadaha, Qunsul sharafeedyada, wakiillada Qunsuliyadaha iyo karaaniyaasha qunsuliyadaha ma hoos imanayaan awoodda garsoor, ee Dawladda degaan-hawleedka, xagga falalka la xiriira xilalkooda.

**Qod. 13**

Hawlwadeennada Qunsuliyadaha kuma khasbana in ay markhaati ah ka soo hor-muuqdaan maxkamadaha Dawladda degaan-hawleedka (Dawladdamartida loo yahay).
Hadii markhaati furkoodu uu lagama maarmaan noqdo, ayada oo lagu gudajiro garmaqal maxkamadeed (garsoor) ayagaas waxaa su'aalo laga weydiinayaa, halkey ku shaqeynayaan, si aancarqalad loogu geysan gudashada xilalkooda rasmiga ah.
waqti macquul ah ayaa la siin doonaa iyaga, sidoo kale haddii ay dhacdo in ay u arkaan inay in ay la gudboon tahay in ay oggolaansho weydiisanayaan xukuumaddooda.

Haddii hawlwadeennadaa iyo karraaniyaasha qunsuliyadaha, qunsulka sharafeedka iyo ku-xigeennadaa qunsuliyadaha iyo wakiillada qunsuliyadaha ay hey'adda garsoorka ee Dowlada dagaanka hawleed weydiisato inay ka marag kacaan dukumiintiyada laxiriira howlahooda ama dukumiintiyada arkiifiga (keydka qoraalka) ama dukumiinti kale oo qunsuliyadeed ama soo bandhigaan Dukumiintiyada noocan ah ama in ay fasiraad ka bixiyaan, sharciga Dawladda soo diratay(soo-diratada), way ka waaban karaan inay u hoggaansamaan codsigan haddii ay tani ka hor imaanayso waajibaadkooda asaasiga ah ee dhawrista sirta xirfadeed.

**Qod. 14**

Hawlwadeennada qunsuliyadaha, xaasaskooda iyo carruurtooda yaryar, ee ayaga la nool, laguma dhaqayo axkaamta maqaamka deggaanaan xagga ruqsada degganaanshaha, diiwaangelita iyo kontroolka ajaanibta.

**Qod. 15**

Mushaaraadka, gunnooyinka, mushaharooyinka iyo wixii la mid ah ee la siiyay qunsullada, hawlwadeennada (saraakiisha) iyo karraaniyaasha qunsuliyadaha waa laga dhaafay canshuur kasta, ha ahaato mid dawladeed iyo maxalli ah (degaan) , daqli ahaan, lagu dabaqay ama laga soo aruuriyay Dawladda degaanka hawleed (ay deggan yihiin, waa haddii ay ka-faa'iideystayaashu aysan ahayn muwaaddin dawladdan dambe iyo in dakhligaas uu ka yimid howlaha qunsuliyadeed halkaas lagu qabtay.

Axkaamta faqradda hore ma khuseeyaan canshuuraha saaran, sabab kasta ha loogu yeeshee, hantida maguurtada ah oo ay hawlwadeennada, karraaniyaasha, qunsul sharafeedyada iyo wakiillada qunsuliyadaha ku leeyihiin dhulka Dawladda degaanka-hawleed (Dawladda martida loo yahay).

Qunsullada xirfadda waxaa kale oo laga dhaafay bixinta canshuuraha lagu dabbaqo baabuurta iyo doomaha ay milkida u leeyihiin.

**Qod. 16**

Dawladda dirtada ah waxay xaq u leeyahay in ay dhulka Dawladda degaan-hawleedka soo geliso, ayada oo laga dhaafay wixii canshuur ah ama xuquuq (dawladeed, goboleed, degmo, dawlad hoose iyo hayad kale, ee dawladeed) oo la xiriirta soo-dejinta, agabka, maacuunta, qalabka lagu bilo guryaha iyo alaabada kale, ee loogu talagalay in lagu isticmaalo xafiisyada qunsuliyadaha. Hab-dhaqan kaas la mid ah waxaa loo isticmaalayaa xagga baabuurta, doonyaha iyo diyaaradaha, oo si' gooni ah loogu talagalay isticmaalka xafiisyada qunsuliyadaha, ayada oo la dhowrayo xadka ku degsan axkaamta maxalliga ah.

Hawlwadeennada qunsuliyadaha waxa ay xaq u leeyihiin in ay dhulka Dawladda ay martida u yihiin ka kala soo degeen (soo geliyaan), ayada oo laga dhaafayo wixii canshuur ama xuquuq ah (mid dawladeed, goboleed, degmo, Dawlad hoose ama hayad kale, ee dawladeed, ee

la xiriirta soo-dejinta ama sababteeda, xammuulka, dharka iyo qalabka kale ee asturka shakhsiga, waxa la quuto iyo wixii alaab kale ah. Canshuur-dhaafkaas waxaa lagu dabbaqayaa alaabta ay wataan hawlwadeennada qunsuliyadaha, marka ugu horreysa oo ay soo degayaan, iyo safarradooda xiga, ee inta lagu gudajiro muddada ay ka shaqaynayaan xafiiska qunsuliyadda. Mucaamiladaas mid la mida waxaa loo isticmaalayaa baabuurta, doonyaha, iyo diyaaradaha iyo qalabka raadiya iyo telefishinka ilaa xadka ay gooynayaan (dhigayaan) axkaamta maxalliga ah, waxaase shardi ah in ashaadaas ay tahay midloo qoondeeyey isticmaalka shakhsi, ee hawlwadeennada qunsuliyadaha iyo xubnaha qoysaskooda oo la nool.

Qunsullada sharafeed, wakiillada iyo hawlwadeennada qunsuliyada waxay xaq u leeyihiin kaliya munaasabada degitaankooda koowaad, iyo sanad gudihiis laga bilaabo maalinta ay bilaabayaan hawlahooda, inay dhulka soo geliyaan , ayada oo laga dhaafayo canshuur kasta ama xuquuq ah(mid dawladeed, gobol, degmo, dawlad hoose ama hayad kale, ee dawladeed u soo dhoofiyaan dhulka iyagoo xor ka ah wixii canshuur ama xuquuq ah (dowlad, gobol, gobol, degmo ka tirsan hay'ad dawladeed) oo ku waajibeysa xagga soo-dejinta ama sababteeda ku timid, xammuulka, iyo alaabta loogu talagay, gaar ahaan, isticmaalka shakhsiga iyo agabka kale, ee guryaha lagu isticmaalo, haddii alaabtaas ay tahay mid, gooni ahaan, loogu talagay isticmaalkooda shakhsi ama isticmaalka xubnaha qoysaskooda, ee la nool.

Ma jirto canshuur, xaddidaad ama mamnuucid dhoofin alaab, ee lagu dabbaqayo hawlwadeennada iyo karraaniyaasha qunsuliyadaha, qunsullada sharafeed iyo wakiillada qunsuliyadaha, xagga dhammaan hantidooda, marka ay ku laabanayaan dalkooda, dabayaaqada hawlshooda dibloomasi.

**Qod. 17**

Hawlwadeennadaa qunsuliyadaha, qunsullada sharafeed, wakiillada iyo karaanniyaasha qunsuliyada waxay xaq u leeyihiin ilaalin gaar ah iyo ixtiraam dhamaan hawlwadeennada wadanka ay deggan yihiin.

## CINWAANKA 3AAD

Hawlaha Qunsuliyadaha

**Qod. 18**

Iyada oo la raacayo mabaadi'da iyo hab/dhaqanka (caadooyinka) caalamiga ah , Qunsullada iyo Wakiilada qunsuliyadaha waxay ilaalinayaan danaha guud ee Dawladda dirtada ah, iyo muwaadiniinta Dawladda la soo sheegay waxayna, sidaas awgeed, la xiriiri karaa Madaxda /masuuliyiinta) awoodda u leh, ee Dawladda ay dhulkeeda deggan yihiin.

Waxay sidoo kale la xiriiri karaan dadka ay ka dhasheen, kaala talin karaan, ka caawin karaan codsiyadooda wax qabad ama howlahooda Maamulka deegaanka waxayna xaqiijin karaan, haddii loo baahdo, gacan-siinta xagga sharciga iyo Iegali ama tarjamada.

**Qod. 19**

Madaxda awooda u leh waxaa waajib ku ah inay wargeliyaan, sida ugu dhaqsaha badan, Qunsullada, ayada oo loo fiiriinayo sida lookala leeyaha awoodda dhul ahaaneed, ee xirigga ama haynta muwaadinka Dawladda dirtada ah (soo-dirsatay). Qunsullada waxaa loo oggol yahay, sí waafaqsan xeerarka habka garranka (dacwad-qaadista), ee Dawladda degaanka hawleed, inay booqdaan, shakhsiyan ama ayaga oo adeegsanaya dad ay u xisaarteen, muwaadiniinta kor lagu soo sheegay, sí ay uga caawiyaan xagga difaacooda iyo waxayaabo kale oo baahdaan. Madaxda (masuuliinta) awoodda u leh, ee Dawladda degaanka hawleed (Dawladda degaan-hawleedka)

waxa ay qunsullada u gudbinayaa wixii war iyo macluumaad ah, ee ka soo gaara muwaadinka xiran, ee Dawladda dirtada ah qunsuliyadda (Dawladda soo-dirsatada qunsulka ama qunsuliyaddaba).

**Qod. 20**

Qunsullada, oo loo eegayo awoodooda ku saleysan shuruucda iyo tilmaamaha Dawladda dirtada ah, waxay sameyn kartaa: "

1) in ay qabtaan ama u gudbiyaan dukumiintiyada maqaamka madaniga ah, ee khuseeya muwaadiniintooda;
2) in ay sameeyaan heshiiska guurka, ee dhexmaraya muwaadiniintooda, haddii guurkaas uu yahay mid uu banneynayo sharciga Dawlaladda dirtada ah (Dawladda soo diratay qunsuliyadda). Guurkaas laftiisa

waa in lagu wargeliyaa, sida ugu dhaqsiyaha badan, Madaxda Dalka deggaaanka ay ka hawlgalaan (masuuliinta dalka degganaanshahahawleed);

3) In ay qaab notaayo u sharciyeeyaan:

   A) Qoraallada mucaamilo iyo heshiisyada ay muwaadiniintooda rabaan in ay ku galaan qaabkaas, marka laga reebo rahanta khueysa guntidda hantida maguurto ah, ee ku taal dhulka Dawladda degaanka hawleed;
   B) Qoraallada mucaamilo iyo heshiisyada, jinsiyad kasta ha lahaadeen dhinacyada, ee ku saabsan hantida ku taal (dhacda) ama dano lagu qabanya dhulka Dawladda dirtada ah qunsuliyadda (Dawladda soo-dirsatay) ama saameyn sharci ku yeelaneysa dhulka Dawladdaas la sheegay.

Qoraallada ay qunsullada u sharciyeeyeen qaababka waafaqsan sharciyada Dawladda dirtada ah (Dawladda soo dirsatay), iyo nuqulladooda ama minguurintooda, ee uu sí sharci ah u tasdiiqay isla Qunsulkaas, lehna shaabbadda rasmiga, ee xafiiskooda, waa laga rumeysanayaa caddaaladda, iyo dibeddeeda, madax kasta oo ka tirsan labada Dawladood hortooda, waxayna yeelanayaan isla awoodda (xoogga) caddeyn (marag-fur) iyo qiimaha oo ay yeelan lahaayeen,haddii uu sharciyeyn lahaa notaaye ama sarkaal kale, ee dawladeed oo awood u leh, ee labada dal, hase yeehee waxaa shardi ah in marsiiyey boolllada, diiwaangelin iyo qaab kasta oo laga isticmaalo Dawladda degaanka hawleed (Daladda martida loo yahay).

**Qod. 21**

Qunsulladu waxaa kale oo ay awooddaan:

1) in ay muwaadiniintooda ku qori karaan diiwaannada dhigista, ee muwaadiniinta;
2) in ay muwaadiniintaas siiyaan Baasaboorro, dhaafiye iyo wixii dokumentiyo kale, ee shakhsi ah;
3) in ay dal-ku-gal ugu dhuftaan baasaboorradaama dokumentiyada safar, ee cid kasta oo dooneysa in ay gaarto dhulka Dawladda dirtada ah (Dawladda soo diratay qunsuliyadda);
4) in ay fuliyaan dhammaan hawlgallada la xiriira tababarka ciidan, ee ku jaheysan muwaadiniinta Dawladda dirtada ah (Dawladda soo diratay qunsuliyadda);
5) in ay sharciyeeyaan caddeyn kasta ama qaabeeyaan qoraal kasta, tasdiiqaan ama sugaan saxiixyada, saaran, caddeeyaan ama tarjumaan dokumenti marka qoraalladaas iyo qaabka ay farayaan sharciyada ama awaamirta Dawladda dirtata ah (Dawladda soo dirsatay qunsuliyadda);

6) in ay tarjumaan, ayna tasdiiqaannooc kasta oo dokumenti (qoraal) oo ay soo saareen madaxda (masuuliinta) Dawladda soo-diratada ah (Dawladda soo diratay qunsuliyadda ama qunsulka); tarjumadaas waxa ay, Dawladda degaanka-hawleed gudaheeda, ka yeelaneysaa isla xoogga sharci iyo qiimaha oo ay yeelan lahayd haddii ay fulin lahaayeen turjumaanno la dhaariyey, ee dalka.

**Qod. 22**

Marka la adeegsanaayo axkaamta labada qodob ee hore, Dawladda degaanka hawleed waxay madaxda, aqoon u leh, u-qaybineysaa in ay tasdiiqaan, xagga xafiisyada kala duwan, ee maamulkeeda, saxiixyada qunsullada xirfadeed iyo qunsul sharafeedyada iyo wakiillada qunsuliyadeed. Saxiixyadaas waxaa la dhigayaa madaxda (masuuliinta) horey loo soo sheegay.

Isla madaxdaas waxay awood u leedahay in ay sugto saxiixyada hawlwadeennada maamulladooda, ee dul saran qoraallada mucaamalooyinka, oo ay tahay in uu qunsulku tasdiiqo, tarjumo, minguuriyo, sí ay saameyn sharci uga yeeshaan dhulka Dawladda diratada ah (Dawladda soo diratay qunsulka).

**Qod. 23**

Qunsulladu waxa ay awoodaan xataa:

1) In ay la wareegaan, sí waafaqsan sharciyada Dawladda soo-diratada, qayimnimada iyo kafaalada muwaadiniintooda dhantaalan;
2) In ay gudbiyaan, arrimaha madaniga ama ganacsiga, dokumentiyada garsoorka iyo kuwa garsoorka ka baxsan iyo in ay fuliyaan adeegga garsoor, ee makamadaha Dawladda dirtada ah (Dawladda soo-diratay);
3) In ay keydka ka higaan lacagaha, dokumetiyada iyo ashyaaáda nooc kasta, oo ay u dhiibtaan muwaadniinta Dawladda dirtada ah (Dawladda soo diratay) am yaga oo ka wakiil ah;
4) In ay xaqijiyaan, xadka ku cad CINWAANNAD 4AAD iyo 5AAD, heshiiska caalamiga ah, Maamulka wixii dhaxal ah, ee khuseeya muwaadiintooda iyo ku dabbaqidda sharciyada Dawladda dirtada ah (Dawladda soo diratay), maraakiibta ganacsiga.

**Qod. 24**

Ka sokow xilalka (hawlaha) sida gaarka ah loogu tilmaamay heshiiska caalamiga ah, qunsullada waxa ay u idman yihiin in ay qabtaan hawl kasta oo kale, oo waafaqsan sharciga iyo hab-dhaqammada caalamiga ah.

## CINWAANKA 4AAD

Dhaxal

**Qod. 25**

Haddii ay geeri ku timaado muwaandin u dhashay mid ka mid ah dhinacyada Sare, ee heshiiska, asaga oo ku sugan dhulka kan kale, Hayadda maxalliga ah, ee awoodda u leh, waa in ay degdeg u ogeysiiso qunsulka, ay degaan hawleedkiisa geeridu ka dhacday. Qunsulku, dhankiisa, haddii uu hor ogaado, waxa uu ogeysiis siinayaa Hayadda maxalliga ah.

Haddii qaar ka mid ah dhaxaltooyada marxuumka aysan joogin ama dá yar yihiin ama ay dhantaalan yihiin (awood-daran yihiin), amaba dadka fulinaya dardaaranka, ee uu magacaabay marxuumka aysan joogin meesha lagu furaayo dhaxalka, waxaa lingax la dhul saarayaa, afar iyo labaatan saac gudahood, laga bilaabo marka la helo ogeysiiska geerida, dhammaan hantida maguurtada ah, dokumentiyada iyo waraaqaha xiriirka marxuumku qoray.

Lingax saaridda waxaa sameynaya, xafiis ahaan ama asaga oo ka duulaya codsiga dhinacyada daneynaya, qunsulka ayada oo ay goobjoog tahay hayadda maxalliga ah, oo ay ahayd in asagu horey u wargeliyo. Ayada oo la raacayo isla habkaas lagu soo sheegay faqradda hore, waxaa lagu dhaqaaqayaa fujinta lingaxyada.

**Qod. 26**

Marka la fufujiyo lingaxyada, qunsulku, ka dib markuu diyaaryo tirakoobka, waxa awoodaa, haddii ay dhaxlayaashu weydiistaan, in uu maamulo oo qaybiyo dhaxalka, sí toos ah ama asaga oo adeegsanaya qof uu u xilsaaray. Sidaas darteed, qunsulku waxa uu ku dhaqaaqi karaa, ayada oo la raacayo qaababka sharciyadu jideeyeen iyo caadooyinka ka jira Dawladda degaanka hawleed, iibka guurtada iyo alaabta baabàeysa, ama xafidaaddeeda kharash badan ku baxayo; waxa uu soo uruurin karaa wixii amah ahaa oo muddadoodii la gaaray, ama dhacaaya, dul saarka amaahaha, kirooyinka waqtigooda dhacay, soo qaado wixii keyd ama lacag ah, ee yiil bankiyada iyo khasnadaha keydka; ku dhaqaaqo furitaanka khasnadaha, soo qaado wixii dad ku maqaa, bixiyane wxii lacag ah, ee lagu lahaa ama lagu yelan karay sí kasta oo lagu kala lahaa, raasumaal iyo wixii raacsan, inuu qaado wixii tallaabooyin ah, ee loogu baahan yahay xagga ilaalinta xuquuqda iyo hantida dhaxalka ah, ku hawlgalo wixii raasumaal ah, ee laga helay degaanka marxuumka ama la soo uruuriyey geerida ka dib, inuu ku dadaalo bixinta kharashka aaska iyo bixint deymaha dhaxalka, iyo guud ahaan inuu qaado tillaabo kasta oo loo baahan yahay sí uu u xaqiijiyo uuna qaybiyo wixii soo hara.

Qunsulku waxa uu geerida dhacday ku faafinyaa (nashrinayaa) wargeysyada waaweyn, ee ka soo baxa deegaan hawleedka, ee qunsuliyadda, waxa uuna ogeysiska la xiriira ku dhejinayaa xarunta qunuliyadda. Asagu kuma tillaabsan karo wareejinta xaasilka dhaxalka ilaa la bixiyo wixii deyn ahaa, ee marxuumka lagaga lahaa dhulka Dawladda degaan-hawleedkiisii, ayada oo loo shardinayo in lix bilood gudahood, laga bilaabo taariikhda nashrinta ogeysiiskaas horey loo soo sheegay, aan la soo bandhigin dacwo khuseysa dhaxalka.

**Qod. 27**

Marka mawaadin, u dhasha mid ka mida dhacyada Sare, ee heshiiska caalamiga ah, uu ku dhinto dhulka kan kale, meel uusan ka jirin xafiis qunsulid, ee Dawladdiisa, Hayadda maxalli ah waxa ay qaadeysa dhammaan tillabooyin xafidaadah, oo lagu badbaadinayo xoolaha dhaxalka, waxayna degdeg u ogeysiineysaa Qunsulka oo degaan hawleedkiisa ay ka dhacday geerida.

Qunsulku waxa uu xaadiri karaa shakhsiyan ama u diri karaa qof uu u xilsaaratay, goobta, sí u qabto (ula wareego) maamulka iyo hawlaha xaraashka xoolaha dhaxalka ah, sí waafaqsan qodobbada hore. Haddii Qunsulka ama qof uu u xilsaartay uusan soo xaadin goobta, Hayadda maxalliga ah waxa ay ku dhaqaaqeysaa maamulka iyo xaraashka xoolaha dhaxalka ah, waxaana lagu xisaabtamayaa hawlgalladan. Hayadda la soo sheegay (carrabaabay) waxay kaloo gudbineysaa saamiyada xaasilka xoolaha dhaxalka oo xaqa u leeyihiin muwaadiniinta dawladda dirtada ah, oo ka maqan Dawladda degaanka-hawleed.

**Qod. 28**

Qunsuka kaliya ayeey la gudboon tahay inuu qoro xaashida tirakoobka iyo in uu ku dhaqaaqo hawlgallada kale, looga baahan yahay xagga xafidaadda hantida iyo alaabta kale, nooc kasta, oo ay ka tagaan muwaadiniinta – badmaaxyo ama rakaab – u dhashay Dawladda dirtada ah, oo dhintay ayaga oo saaran markab laga leeyahay dalkooda, inta ayan soo gaarin dekeddaas

ama dhulka ka dib marka ay soo degeen ama intii lagu gudajiro safar ama hakad lagu yahay dhulka Dawladda degaanka hawleed.

## CINWAANKA 5AAD

Badmaaxidda

### Qod. 29

Marka markab saran yahay (babbinaya) calanka Dawladda dirtada oo ku sugan yahay deked ku taal Dawladda degaanka hawleed, Qunsulku shaqsi ahaan ayuu u tagi karaa ama wakiilladiisa ayuu ugu diri karaa markabka kadib marka la siiyo oggolaanshaha xurriyada dhaqdhaqaaqa.

Asagu waxa uu sí xor ah u wareysan karaa kabtanka iyo xubnaha shaqaalaha, ee markabka, baaro dokumentiga markabka dhushiisa, dariiqa (khadka) uu marayo iyo halka uu ku jahaysan yahay markabka, kuna wareejiyo, asaga oo ka wakiil ah Dawladda dirtada ah (Dawladda soo diratay), dhammaan dokumentiyada lagama maarmaanka u ah bixitaanka markabka qudhiisa.

Kabtanka iyo xubnaha shaqaalaha waxa ay u idman yihiin in ay la xiriiraan Qunsulka iyo in ay tagaan Xafiiska qunsulka.

### Qod. 30

Qunsulku waxa uu ka warqabayaa ama tillaabo ka qaadayaa xagga ilaalinta nabadgelyada gudaha iyo dusha maraakiibta ganacsi, ee uu saran yahay (dul babanayo) calanka Dawladda tirtada ah (soo diratay).

Asaga ayaa xalinaya wixii murumo ah, dabeecad kasta ha lahaadee, ee u dhexeeya kabtanka, saraakiisha markaka iyo xubnaha shaqaalaha, oo ay ku jiraan kuwa ku saabsan mushaarka iyo fulinta heshiika qoritaanka, ee xubnah shaqaalaha markaba. Waxaa kale ee uu adeegsan karaa awoodaha ay siisa Dawladda dirtada ah (soo dirsatay), xagga wixii khuseeya qoritaanka shaqaale, fuulitaanka iyo ka-degidda badmaaxyada iyo kala dambeyna markabka dushiisa iyo in uu xataa wax ka qabto isbitaal dhigida (seexinta) iyo dib ugu celinta waddanka, ee kabtanka ama xubnaha shaaalaha markabka ka degay.

### Qod. 31

Sí waafaqsan habdhaqannada caalamiga, Hayadaha Dawladda Degaanka hawleed marnaba sooma dhexgelayaan arrin ka dhacday markab dushiis, marka laga reebo haddii uu dhaco shilal carqaladeynaya degganaanshaha iyo nidaam guud, ee ka jira dhulka ama dekedda gudaheeda, ama dhibaal u keeni kara caafimaadka (bed-qabka) iyo amniga guud, ama ay ku lug-leeyihiin dad ka baxsan shaqaalaha markabka.

Hayadahan, haddii uusan jirin tanaasul xagga dadka ay khuseyso, waa in ay wargeliyaan, waqti habboon, Qunsulka awoodda ikhtisaas u leh, sì asagan uu goobjoog ugu noqdo booqashooyinka, baaritaannada ama xarigga ay hayadaas ku talajiraan in ay fuliyaan (ku dhaqaaqaan).

Wargelinta ujeeddadaas loo sameeyey waa in ay tilmaanto (ka muuto) saacadda saxda, iyo haddii Qunsulku uusan imaani (soo xaadirin), ama uusa cidna wakiilan, waxaa hawsha la gelayaa asaga oo maqan. Habkaas hab la mida waa in la raaco, haddii kabtanka ama shaqaalaha markabka ay tahay in ay caddeyn ka bixyaan maxkmadda horteeda ama Hayadda maaxalli ah horteeda.

**Qod. 32**

Qunsulku waxa uu awoodaa, sí waafaqsan sharciyada looga dhaqmo Dawladda soo dirsatay (diratada), inuu sharciyeeyo dokumenti kasta oo khuseysa:

1) Diiwaagelinta (gal iyo lambar aqosi ah u-yeelidda) maraakiibta Dawladda soo diratay (dirtada) ama tirtiridda galalkood iyo lambarradooda aqoosi;
2) Raridda iyo dejinta maraakiibta ka diiwaangashan Dawladda soo dirtay (dirtada);
3) Qoridda wixii isbeddello ku yimid lahaanshaha maraakiibta ka diiwaangashan Dawladda dirtada (soo dirtay) ama rahammaha ama ah xuquuq kale oo cusleyneysa (saran) maraakiibtaas;
4) Gadashada maraakiib ajnabi, ee loogu talagalay, in laga diiwaangeliyo Dawladda diratada ama iibka maraakiib waddani ah (qarameed);
5) Duminta maraakiibta waddaniga.

**Qod. 33**

Marka markab uu saran yahay (babbinaya) calanka Dawladda dirtada ah uu dego ama ku caariyo xeebta Dawladda Degaanka hawleed, Qunsulka awoodda ikhtisaas u leh ayaa, isla goorta ay suurtagal noqoto, waxaa uu wargelinayaa Hayadaha maxalliga ah.

Hayadahaas maxalliga waxa ay qaadayaan dhammaan tillaabooyinka degdegta loogu baahan yahay, sí loo ilaayo nidaamka, loo xaqiijiyo dhowrmada maraakbta, dadka iyo hantida markabka la jabay ama sí looga fursado wixii khasaara, ee gaari ahaa maraakiib kale ama qalabka dekadaha.

Dhammaan hawlgallada la xiriira samatabixinta waxaa hoggaamin kara Qunsulka awoodda u leh ama qof uu asagu u xilsaartay, ayada oo ay caawinayaan Masuuliinta goobta. Haddii laga reebo marka ay jirto baahi, qalabka ku habboon hawlgallada samatabixinta waxaa dooran kara dadka uu shilka khuseeyo ama Qunsulka.

Qunsulku waxa uu qaadi karaa, marka uu maqan yahay milkiilaha markabka, dhammaan wixii góaanno ah, ee habboon, xagga wixii khuseeya aayaha markabka, iyo waliba xafidaadda iyo halka la geynayo hantida laga soo ceymiyey shilka, oo ay leeyihiin muwaadiniinta Dawladdamdirtada ah (soo diratay qunsulka iyo qunsuliyaada).

Soo-dhexgal Masuuliinta maxalliga ma keeneyso wax kharash celin nooc kasta, haddii laga reebo wixii ku baxay hawlgallda samatabixinta iyo xafidaadda hantida la soo badbaadiyey iyo kuwa fuuli lahaa, xaaladdaas oo kale, Dawladda degaanka hawleed.

Badeecooyinka iyo hantida laga ceymiyey shilka markab ma koreyso xuquuq iyo canshuur soo-dejin, haddii aan loogu talagelin isticmaal gudaha dhulka Dawladda degaaka hawleed. Xeerarka ugu dambeeya

**Qod. 34**

Qoraallada mucaamalaadka, ee la sameeyo inta lagu gudajiro fulinta hawlaha qunsuliyadeed waxa ka dhalan kara khidmado (xuquuq) iyo canshuuro, sida a dhigayaan sharciyada Dawladda dirtada (soo dirtay), laakiin Dawladda degaanka hawleed ma saari karto ayadana markeed.

**Qod. 35**

Haddii dhinacyada Sare, ee heshiiska, uu dhexdooda ka aloosmo khilaaf la xiriira fasiraadda ama dabbaqidda Heshiiska caalamiga, ayagu waxa ay isku shuqlayaan in ay u bandhigaan Guddi Heshiisiin (sulux) oo ka kooban hal wakiil dhinac Sare, oo kasta.

Labadaan wakiil, haddii ay heshiis ku gaariwaayaan saddex bilood gudahood, waxay isafgarad ku magacaabayaa xubin kale, oo ah muwaadin Dawlad saddexaad. Haddii heshiis la waayo, laba bilood gudahood, laga bilaabo taariikhda magacaabidda xubinta saddexaad, middaan dambe (xubintan dambe) waxaa magacaabi doona, ayada oo lagu saynayo codsiga dhinac ka mida dhinacyada Sare, Guddoomiyaha Maxkamadda Caalamiga, ee Caddaaladda. Guddiga suluxa (heshiisiinta) waxa uu qaadanayaa magaca iyo xilka Guddi Garsoor, ee Dhedhexaadin.
Guddiga Dhexdhexaadinta waxaa uu góaan ku gaaraa cod aqlabiyadda. Góaankiisa waxa uu noqonyaa mid kama dambeys, dhinacyadana khasab ku ah in ay raacaan.

Heshiiskan caalamiga waxa uu dhaqangelaya isla marka la is-dhaafsado góaannada meelmarinta.

Heshiikan waxa uu dhaqangal ahaanayaa ilaa inta dhinacyada Sare, ee heshiiska, midkood ka sheegto (ka cilladeeyo ama ka baxo) asaga oo dhinaca kale siinaya ogeysiis hal sano ah.

Ayaga oo aaminsan qodobbada kor ku xusan Wakiillada awoodda buuxda leh, ee dhinacyada Sare, waxa ay saxiixeen Heshiiskan, waxayna saareen shaabbadahooda.
Waxaa lagu sameeyey Muqdisho, 1da Luulyo 1960, kana kooban laba nuqul.

Dhanka Jamhuuriyadda Talyaaniga
**Carlo Russo**

Dhanka Jamhuuriyadda Soomaaliyeed
**Mohamed S. Gabiou**

## MUCAAHADO GANACSI IYO WADA-SHAQAYNTA DHAQAALE EE KA DHEXEYSA ITAALYA IYO SOOMAALIYA.

Xukuumadda Talyaaniga iyo Xukuumadda Soomaaliyeed, ayaga oo ka shidaal qaadanaya rabitaanka ah in ay xoojiyaan xiriirka saaxiibtinimo, ee dhow, oo mideynaya labada dal iyo in ay horumariyaan xiriirradooda dhaqaale, ayada oo la ixtiraamaayo danahooda ay kala leeyihiin;

Ayada oo maanka lagu haayo mabaadída ay hiigsaneyso Mucaahadada Saaxiibtinimo, ayeey saxiixeen taariikhda manta, kuna heshiiyeen arrimaha soo socda:

### CINWAANKA 1AAD
Isdhaafsi Ganacsi

**Qod. 1**

Dhinacyada Mucaahada waxa ay isku-shuqlinayaan (isku-hawlayaan), in ay dhiirrigeliyaan, sí kastaba, horumarka is-dhaafsiga ganacsi iyo in ay taageeraan aqoon wanaagsa, oo loo wada yeesho fursadahooda kala leeyihiin ee soo-dejinta iyo dhoofinta.

Sidaas darteed, dhinacyada Mucaahadada waxa ay isku- shuqlinayaan (isku-hawlayaan), gaar ahaan, in ay tas-hiilaad kasta siiyaan xagga dhoofinta iyo soo-dejinta

badeecooyinka ka soo askuma kana kala yimaada dalalkooda, sí waafaqsan sharciyada iyo xeerarka ka jira mid kasta oo ka mida labada Dal.

**Qod. 2**

Mid kasta oo ka mida dhinacyada Mucaahadada waxa isku hawalyaa in uu oggolaado soo-gelina dhulhiisa badeecooyinka ka soo uskunmay kana imaanaya dhinaca kale, ayada oo la siinaayo xurriyada ugu ballaaran oo ay banneynayaan sharciyada iyo xeerarka ka jira arrinta.

A) Xukuumadda talyaaniga waxa ay isku hawleysaa in ay taageerto in Itaaliya laga soo-dejiyo badeeooyinka ka soo uskanmay kana yimaada Soomaaliya, ee ku xusan liiska "A" oo ku dheggan Mucaahadadan, ugu yaraan ilaa laga gaaro qiimooyinka ayadaas ku tilmaaman, haddii loo baahdana bixineysa ruqsooyinka la xiriira;

B) Xukuumadda Soomaaliyeed waxa ay isku hawleysaa in ay taageerto in xagga Itaaliya loo dhoofiyo badeecooyinka ka soo uskunmay kana yimaada Soomaaliya, ee ku xusan liiska "A" oo ku dheggan Mucaahadadan, ugu yaraa ilaa laga gaaro qiimooyinka ayadaas ku tlmaaman, haddii loo baahdana, bixineysa ruqsooyinka la xiriira.

C) Xukuumadda Soomaaliyeed waxa ay isku hawleysaa in ay taageerto in xagga Soomaaliya laga soo-dejiyo (la soo-geliyo) badeecooyinka ka ka soo uskunmay kana yimaada Itaaliya, ee ku xusan liiska "B" oo ku dheggan Mucaahadadan, ugu yaraa ilaa laga gaaro qiimooyinka ayadaas ku tlmaaman, haddii loo baahdana, bixineysa ruqsooyinka la xiriira.

D) Xukuumadda talyaaniga waxa ay isku hawleysaa in ay taageerto in xagga Soomaaliya loo soo dhoofiyo badeecooyinka ka ka soo uskunmay kana yimaada Itaaliya, ee ku xusan liiska "B" oo ku dheggan Mucaahadadan, ugu yaraa ilaa laga gaaro qiimooyinka ayadaas ku tlmaaman, haddii loo baahdana, bixineysa ruqsooyinka la xiriira.

E) Dhinacyada Heshiiska waxaa kale oo ay isku hawlayaan in, intii muddo ahba, ay is-dhafsadaan dhamaan wixii macluumaad loo baahan yahay, ee la xiriira xaaladda isticmaal, ee qoondooyinka ka muuqda liisaska Lifaaqa 1, ee ku dheggan Mucaahadan.

**Qod. 3**

Mid kasta oo ka mida dhinacyada Mucaahadada waxa uu u oggolaanayaan ganacsatadiisa ah dhoofiyayaasha iyo soo-dejiyeyaasha in ay, sí xor ah, uga gorgortamaan (uga xaajoodaan) iibka iyo gadashada iyo qodobbada ganacsi, ee la xiriira, ayada oo fahamku yahay, in shirkadaha, uu saran yahay waajibka sameeynta caymiska xagga daabulaadda badeecoyinka, ay u hoggaansamayaan, xagga gelidda heshiiska caymiska, axkaamta sharci, ee ka jirta waddamadooda.

**Qod. 4**

Dhinacyada Mucaahada waxa ay isu oggolaanayaan macaamalada qaranka aad loo doorbido, xagga wixii khuseeya:

1) habraacyada ku saabsan soo-dejinta iyo dhoofinta badeecadaha;
2) xuquuqda dekadeed iyo culeys kasta oo raacsana, hababka uruurinta xuquuqda iyo culeysyyada, xeerarka iyo qaababka la xiriira dekad ka soo-dejinta badeecooyinka, ha ahaato soo-dejinta, hase ahaato dhoofinta iyo weliba hakadka badeecooyinka.

**Qod. 5**

Axkaamta qodobka hore laguma dabbaqayo:

1) bursiinooyinka (faaiidooyinka) gaarka ee uu dhinacyada Mucaahada midkood siiyey ama siin doono dalal kale, ujeedka oo ah inuu fududeeyo dhaqdhaqaaqa xuduudda uu la leeyahay waddamada deriska;
2) bursiinooyinka uu dhinacyada Mucaahadada midkood siiyey ama uu siin doono dalal kale, ayada oo la tixgelinayo waxtarka aasaaska urur dekadeed ama aag wax-is-dhaafsi, ee xor ah;
3) bursiinooyinka ay Itaaliya siiso ama siin doonto Dawladda Faatikaanka, jamhuuriyadda San Martino, boqortooyada Midowday, ee Liibiya;
4) Tixgelin eexeyn ah iyo bursiinooyin oo dhinacyada midkood uu bixinaayo ama bixin doono, ayada oo lala xiriirinaayo ka-qaybgalkiisa urur ay dhiseen dhowr dal, sí ay wada abaabulaan hal ama dhowr aag, ee wax-soo-saarka, ganacsiga ama adeegyada ama wax uga qabtaan amniga.

**Qod. 6**

Xukuumadda talyaaniga, sí ay gacan uga geysato horumarinta soo-dejinta badeecooyin asal ahaan ka soo askunmay, kana imaanaya Soomaaliya, waxa ay ku dadaaleysaa (isku hawleysaa) in ay ayaga u meel-dhigto nidaamka dekadeed, ee mudnaanta iyo doorbidka, ee gaar ahaaneed, oo hadda la dabbaqo (lagu dhaqmo), ayada oo aan loo eegin heshiisyada gaarka, oo loo kala saxiixan karo waxyaabo la soo saaro oo mucayan ah, waase in nidaamkaas doorbidka iyo eexinta ah uu sí caddaan ah u oggoolaado Heshiiska Guud ee Ganacsiga iyo Taariifada (G.A.T.T.).

**Qod. 7**

Haddii axkaamta Mucaahadadan iyo kuwa ku jira qoraallada dhismeed iyo fulineed, ee urur, oo ay dhinacyada ku biireen, kaas oo ay dhiseen dhowr Dawladood, sí ay u wada dhiirrigeliyaan horumarkooda dhaqaale, nidaaminayaan isla arrinta, waxaa lagu dhaqmayaa xeerarka ku jira qoraalladaas.

**CINWAANKA 2AAD**

Nidaamka lacago Bixinta Qorsheysan

**Qod. 8**

Dhinacyada waxa ay ballanqaadayaan in ay xafidaan muddo laba sano ah , laga bilaabo taariikhda saxiixa Mucaahadada, nidaamka lacag-bixinta qorsheysan, ee isku-tuurka guud, ayada oo la marinayo xisaab laga furay Xafiiska tanyaaniga, ee sarrifka, oo ku qoran magaca Bankiga Qaranka Soomaaliya.

**Qod. 9**

Marka nidaamka isku-turidda (isu tuuridda deymaha) guud ee uu dhigayo qodobka 8 uu waqtigiisu dhammaado, bixinta lacagta udhaxeysa labada dal waxaa lagu xallin doonaa iyada oo aan xal sii-wadid loo helin, iyadoo la raacayo qawaaniinta lacagta ee ka kala jira waddammada, oo ah Liirada Talyaaniga ee xisaab banki, ee dibedda ku jirta ama ah lacago adag, ee kale oo la beddeli karo qiimana ku leh suuqa sarrifka lacagaha ee talyaaniga.

**Qod. 10**

Muddada labada sano ah, ee ku xusan Qodobka 8aad, waxaa loo soo gaabin karaa 18 bilood, haddii laba Xukuumadood uu dhexmaro is-afgarad bisha shan iyo tobnaad gudaheed, laga bilaabo dhaqangalka Mucaahadadan.

**Qod. 11**

Dhinacyadu waxa ay ku isku waafaqi karaan ku sii-dhaqanka nidaamka isku- tuuridda deymaha (sifeynta), ee guud, oo ku xusan qodobka 8aad, oo xataa ka badan 12ka sano oo la banneeyey. Dalabka la xiriira arrintaas waxaa la soo qaddimi karaa bisha kow iyo labaatanaad gudaheeda, laga bilaabo taariikhda dhaqangalka Mucaahadadan.

**Qod. 12**

Lacag-bixinaha qorsheysan, ee dulucda u ah Mucaahadadan, waa kuwa ku xusan liiska ku dheggan (Lifaaq 2) oo ah qayb aan ka góayn Macaahadada qudheeda.

**CINWAANKA 3AAD**

Wada-Shaqaynta Dhaqaale iyo Farsamo

**Qod. 13**

Xukuumadda talyaaniga, ayada oo dooneysa (niyad u haysa) in ay gacan ka geysato horumarka dhaqaale, ee Soomaaliya, gaar ahaan xagga wixii khuseeya qiimeynta khayraadkeeda, kordhinta awooddeeda wax-soo-saar iyo ballaarinta ganacsigeeda dibedda, waxa ay fududeyn doontaa, ayada oo la tixgelinayo **xaaladaha** guud oo ay xeerineyso Mucaahadadan, hirgelinta barnaamijka iskaashiga dhaqaale iyo farsamo oo ka dhexeeya labada Dal, xagga aagga guud iyo midka gaar.

**Qod. 14**

Xagga hirgelinta marnaamijkalagu soo sheegay qodobka hore, Xukuumadda talyaaniga waxa ay oggoshahay:

A) in ay Soomaaliya siiso kaalmada farsamo ee lagama maarmaanka u ah horumarkeeda dhaqaale;
B) in ay dhiirrigeliso wixii maalgelin raasumaal talyaani ah oo lagu sameynaayo Soomaaliya;
C) in ay fududeyso sahay-siin gaar ah, iyada oo lacagta ku baxaysa ay bixinayaan maalqabeen talyaani, ee la siinayo hayado iyo shirkado ka hawlgala Soomaaliya.

Barnaamijka kor ku xusan waxaa lagu horumarin doonaa gaar ahaan aagagga warshadaha, ganacsiga, beeraha, kalluumeysiga, howlaha guud, gaadiidka, isgaarsiinta, ceymiska, dalxiiska iyo sameynta filimada.

**Qod. 15**

Kaalmada farsamo ee ku xusan qodobka 14aad, xarafka A) waxaa lagu fulin karaa iyada oo loo diro khubaro iyo farsamoyaqaanno; loo dirayo ergooyinka daraasadeed; bixinta ruqsada xuquuqda xagga fikirka iyo bixinta ruqsadaha isticmaalka rukhsadaha xuquuqda fikradda iyada oo la aacayo hab lagu heshiin doono; ayada oo la dirayo dukumiinti farsamo; ayada oo wada-shaqayn laga dhex yeesho hayado ku shaqo leh xag dhaqaale, farsamo iyo cilmiyeed; bixinta

deeqda waxbarasho ee loo fidiyo farsamayaqaanno Soomaaliyeed, sí waafaqsan shuruudaha ku qeexan heshiiska kor ku xusan.

Qaaimeynta la soo sheegay meesha ka saari meyso qaababka kale, ee kaalmo farsamo oo loo arki karo waxtar.

**Qod. 16**

Xukuumadda talyaaniga waxa ay dhiirrigelin doontaa ( taageeri doontaa) maalgashiga raasumaal talyaani oo la gelsho Soomaaliya, sida dhigayo qodobka 14aad, xarafka B); Xukuumadda Soomaaliyeed waxa ay, dhankeeda, ballan-qaadeysaa in ay raasumaalka la soo sheegay u xaqiijiso wixii dammaanad ah ee lagama maarmaan u ah, ayada oo raasumaalkaas loo gaar-yeelayo isla macaamilada loo isticmaalo raasumaalka dadka soomaalida ama mucaamilada ugu wanaagsan, ee loo isticmaalo dal saddexaad,haddii ay ka sii–wanaagsan tahay.

**Qod. 17**

Sí loo abuuro jawi u suubban maalgashiga raasumaal tayaaniga, ee Soomaaliya, waxaa loo damaana-qaadi doonaa muwaadiniinta iyo shirkadaha talyaaniga, xagga wixii ku saabsan wareejinta faaiidada iyo raasumaalka oo waddanka loo celinayo, macaamilo aan ka liidan tan soo socota:

A) xagga maalgashiga miradhalka, wareejinta faaiidada, waxaa la oggol yahay xadka: 15 boqolkiiba boqol sanadkii, ee raasumaalka la maalgashaday iyo wareejinta raasumaalka oo xorta loo yahay, shan sano dabadeed iyo haddii ay jiraan xaalada caadiga ka baxsan3 sano kaddib;

B) xagga maalgashiga aan mirodhalka ahayn, wareejinta faaiidada, waxaa la oggol yahay xadka: boqolkiiba 10 sanadkii, ee raasumaalka la geliyey iyo wareejinta raasumaalka oo xorLoo yahay 7 sano kaddib.

Haddaba, wixii faaiidada oo aan, sì kastaba, la wareejin waxaa loo qaadanayaa, marka la eego Mucaahadadan nuqdadaha A) iyo B) in ay tahay wax ku kordhay raasumaalka.

Si kastaba, raasumaalka talyaaniga, ee la geliyey Soomaaliya, waxaa la siinayaa mucaamalada ugu wanaagsan, ee la siiyo dal kasta, ee saddexaad, mucaamalada ugu wanaagsan, ee horey loo soo sheegay.

**Qod. 18**

Xukuumadda talyaaniga waxa ay ballan-qaadeysaa in ay dhiirrigelineyso wada-shaqayn farsamo-lacageed, xagga raasumaalka gaarka, ee tayaaniga, ee shirkadaha madaxa-bannaan iyo hawlqabadka dhaqaale oo ay oggolaatay Xukuumadda soomaaliyeed iyo ayada oo la raacayo habraacyada uu dejin doono Guddiga isku-dhafka, ee ku xusan qodobka 23aad, ee Mucaahadadan.

Taasi waxa ay ku imaaneysaa, ayada oo lagu dhaqaaqo dhismaha shirkado isku-dhafa ama nidaamyo kale, oo ay oggol yihiin sharciyada lacagaha, ee ka jira Soomaaliya.

Xukuumadda soomaaliyeed waxa ay, dhankeeda, ballan-qaadeysaa halabuurradaas madaxa-bannaan iyo in ay raasumaaka talyaaniga u xaqiijiso dammaanadaha ku xusan qodobbada 16aad iyo 17aad, ee Mucaahadadaan.

**Qod. 19**

Xukuumadda talyaaniga, ayada oo tixgelineysa awoodda dhaqaalaha qaran, waxa ay diyaar u tahay in ay shirkadaha talyaaniga siiso, haddii ay weydiistaan, ruqsadaha la xiriira saadsiin gaar,

oo lagu bixinayo muddo dheereyn leh, ee ku socda Xukuumadda soomaaliyeed, hayadaha dawladda (guud) iyo kuwa loo jeheeyey (qoondeeyey) horumarinta dhaqaale iyo bulsho, dalka iyo welibashirkadaha ka hawlgala Soomaaliya, taasna waxa ay u dheceysaa si waafaqsan sharciyada iyo xeerarka ka jira labaa Dal.

Madaxda talyaaniga,ayada oo ka shidaal qaadanaya iskaashiga saaxiibtinimo, waxa ay ka baaran-degi doonaan mashaakilka la xiriira saad-siinta kor lagu soo sheegay, gaar ahaan si loo siiyo muddada lacag-bixinta oo ugu roon intii suurtagala xagga nooca (dabeecadda) iyo xaddiga mashaariicda la hirgelinaayo.

Amaahda (amaahaha) ka yimid saad-siin gaara, oo heshiisyadooda la galay 24 bilood gudahood, ee ka bilawda taariikhda dhaqangalka Mucaahadadan, waxa ay ka faaiideysan doonaan dammaanadaha ku qeexan axkaamta sharciyada talyaaniga, ee jira, ilaa laga gaarro qaddar ah isugeyn 20 milyan oo doollarka mareykanka, ee saadsiin.Saddex bilood ka hor inta aysan dhicin muddadaas kor lagu soo sheegay, labada Xukuumadood waxa ay awoodaan, haddii uu codsado ayagaas midkood, inay bilaabaan wada-xaajood, si ay u baar-baaraan suurtogalnimada in ay gooyaan mablaq (qaada) lacaga, ee cusub.

Xukuumadda soomaaliyeed waxa ay dhankeeda bixineysaa dammaanadaha loogu baahan yahay xagga wareejinta lacagaha ay leeyihiin amaahlayaasha talyaaniga, hadba inti muddadoodu dhacdo.

**Qod. 20**

Tas-hiilaadka uu dhigayo qodobka 19aad, ee Mucaahadadan, waa la siin karaa, haddii hayadaha iyo shirkadaha ka hawlgala Soomaaliya ay ka heleen hayadda (machadka) soo saaridda, ee Soomaaliya, xagga wada-xaajoodka lala bilaabayo shirkadaha talyaaniga, ee bixiya saadka, idin hordhah oggolaanshaha dammaanadda lacag-bixinta, haddiiba la gunto heshiiska.

**Qod. 21**

Hayadda (Machadka) soo saarista, ee Soomaaliya, oo ku hadlaya magaca dowladda Soomaaliya, ayaa noqoneysa dammaanadiisa, qaab wanaagsan, ee habboonna, xagga bixinta iyo wareejinta, dhammaadka muddooyinka ay qeexayaan heshiisyada, qaddarka loo qoondeeyey shirkadaha saad-siinta ee talyaaniga, sí waafaqsan nidaamka lacag-bixinta iyo wareejinta, ee ka dhex jira labada dal ama, haddii aysan jirin, oo ah lacag adag oo la sarrifo karo (la beddeli karo).

Heshiisyada waxa ay dhaqan-gelayaan, kaddib dammaanaadka la soo sheegay, ee uu bixiyeyo Machadka soo-saarista, ee Soomaaliya.

Lacag-bixinta la xiriirta heshiisyadaas waxaa sí toos ah ugu fulin doona shirkadaha ka hawlgala Soomaaliya oo siin doona shirkadaha saad-siinta, ee talyaaniga.

**Qod. 22**

Ayada oo laga ambaqaadayo niyadda wada-shaqaynta, oo saldhigga u ah Mucaahadadan, mid kasta oo dhinacyada ka mida waxa ballan-qaadayaa inuu canshuuraha dekadaha ka dhaafi doono ka-dhoofinta Itaaliya iyo ka soo-dejinta Soomaaliya, ee wixii qalaba, makiinado nooc kasta, maraakiib, diyaarado, iyo baabuur oo loogu talagalay in looga shaqeeyo wershedda iyo ka shaqaynta shirkado wax-soo-saar, iyo weliba faaiidada canshuurta góan, ee diiwaan iyo rahaneed, ee xagga qoraallada mucaamalooyinka iyo heshiisyada loogu baahan yahay saad-siinta, ee hantida la soo sheegay.

## CINWAANKA 4AAD
Qodobbada Dhammaadka

### Qod. 23

Sí loo kormeero dabbaqaadda xeerarka la xiriira is-dhaafsiga ganacsiyeed, loona fududeeyo wada-shaqaynta dhaqaale iyo farsamo, waxaa la dumi doonaa guddi isku-dhaffa oo ka kooban wakiillada labada Xukuumadood oo, haddii loo haahdo, ay kaalinayaan khuburo.
Xoghaye joogto ah, ee Guddiga la soo sheegay, ayaa la dejin doonaa Muqdisho.

### Qod. 24

Guddiga isku-dhafan, ee uu jideeyey qodobka 23aad, ee hore, waxa uu sí talan-taali ah ugu kulmi doonaa caasimadaha labada dal, mar kasta oo uu weydiisto labada dhinac midkood.

Guddiga isku-dhaffan waxa uu ka faaiideysan doonaa wada-shaqaynta Madaxda awoodda u leh, ee labada Dal, wuxuuna hor-dhigayaa labada Xukuumadood talooyin la xiriira arrimaha falanqeeyeen.

Xoghayaha joogtada, ee Guddiga isku-dhaffan, oo xarun ku leh Muqdisho, xilkiisu waa in uu xaqiijiyo baahida loo qabo joogtaynta hawlaha Guddiga iyo gaar ahaan, qaabeynta, habeynta iyo xiriirinta mashaariicda horumarinta dhaqaale iyo farsamo oo ay fuliyeen, sí ku aaddan tas-hiilaadka la iskula waafaqay Mucaahadadan.

### Qod. 25

Haddii uu aloosmo khilaaf la xiriira fasiraadda iyo dabbiqaadda Mucaahadadan, dhinacyadu waxa ku dadaalayaan in ay uga wada tashataani, hab saaxiibtinimo ah, sidii ay ugu heli lahaayeen xal munaasab ah, ayaga oo u gargelyoonaya, haddii loo baahdo, Guddiga ku xusan qodobka 23aad.

### Qod. 26

Mucaahadadan waxaa la marin doona habraaca meelmarinta.
Dhinacyada Mucaahadada, dhanka kale, waxa ay isku-afgarteen in ay sì ku meel gaara u fuliyaan, laga bilaabo taariikhda saxiixa.

Mucaahadadu waxa ay dhaqangal ahaaneysaa laba sano, ayada oo fahamku yahay in, ayada oo aan laga wada hadlin, sanad sanad loo cusbooneysiiyo, haddii uusan dhinacyada midkood diidin (ka sheegn), asaga oo dhinaca kale siinaya ogeysiis saddex bilooda oo ka bilawda taariikhda dhicitaanka mudda Mucaahadada.

Wakiillada awoodda leh ee ka kala socda dhinacyada, waxa ay saxiixay Mucaahadadan, waxayna saaray shaabbadahoodana.

Waxaa lagu sameeyey Muqdisho, 10$^{ka}$ Luulyo 1960.

Dhanka Xukuumadda talyaaniga
**Carlo Russo**

Dhanka Xukuumadda soomaaliyeed
**Mohamed S. Gabiou**

**(LIFAAQA 1)**

**LIISKA A**

**BADEECOOYIN SOOMAALIYEED , EE LAGA SOO-DEJIYO ITALIYA**

| | **QIIME F.O.B (mil. Liire Talyaani …)** |
|---|---|
| Meseggo ……………………………………………… | 200 |
| Miro kulaale …………………………………………… | 6.000 |
| Suuf (Cudbi) ……………………………………………… | 200 |
| Iniino iyo miro saliid leh …………………………………… | 270 |
| Hilbo diyaarsan ……………………………………………… | 350 |
| Kaluun diyyarsan ……………………………………. | 250 |
| Hargo aan la megdeyn, ee ku fiicneyn dhar ka sameynta …………………. | 400 |
| Hargo nus megdeysan …………………………………… | 150 |
| Badeecooyin kale ………………………………………………… | 180 |
| ISUGEYN | 8.000 |

**LIISKA B**

**BADEECOOYIN TALYAANI OO LAGA SOO-DEJINAYO SOOMAALIYA**

| | **Qiime F.O.B (mil. Liire Talyaani)** |
|---|---|
| Bur qamadi ……………………………………………………………. | 250 |
| Baasto qamadi ……………………………………………………… | 150 |
| Bariis ………………………………………………… | 60 |
| Yaanyo diiran ee qasacadeysan ………………………………… | 110 |
| Macmacaan ……………………………………………………………… | 80 |
| Cunnooyin kale, ee xataa qasacadeysan …………………… | 50 |
| Fiino iyo fermouth ……………………………………………………. | 55 |
| Biir …………………………………………………………………………… | 35 |
| Saliid seytuun ……………………………………………………………. | 50 |
| Tubaako laga shaqeeyey …………………………………………. | 75 |
| Dun suufa …………………………………………………………… | 100 |
| Dhar suufa iyo mid isdhafa ……………………………………….. | 800 |
| Dhar ka sameysan dun sannci ah iyo mid aan dabiici ahayn saafi iyo isku-dhafa ……………………………………………………… | 200 |
| Dhar kale ……………………………………………………………………….. | 75 |
| Funaanado, kaalsooyin, iyo dhar kale oo sameysa ………… | 100 |
| Xargo, xargo yar yar iyo gahno (isbaago) …………………….. | 75 |
| Loox iyo hawlo loox, ee ka sameysan dhir falaga iyo caw …. | 100 |
| Xaashi iyo kartoonyo ……………………………………………….. | 350 |
| Alaabo bir ama bir-ciid ka sameysan …………………………….. | 200 |

| | |
|---|---|
| Makiinado, jihaasyo nooc kasta iyo qalab kala duwan iyo Cadadka beddel ……………………………………………………………….. | 2.000 |
| Baabuur iyo cadadkooda beddel ………………………………………. | 600 |
| Mooto-baaskiillo, mootooyin, baaskiillo iyo cadadkooda beddel …………………………………………………………… | 30 |
| Maacuun iyo qalab biro kala duwan ………………………………… | 50 |
| Alaab koronto, raadiyo iyo telefoonno ……………………………… | 65 |
| Alaabo kale, ee wershadaha birta …………………………………….. | 600 |
| Nuurad, shemeento iyo tabaashiir …………………………………….. | 100 |
| Alaabo kale, oo dhismo ……………………………………………………. | 50 |
| Tacabka ama alaabta ka soo jeedda ama xiriir la leh Iyo tan aan ka soo jeedi ama aan la xiriirin noolaha ay ku jiraan waxyaabaha loo adegsado bacraminta iyo tacabka la xiriira dawooyinka ……………………………………………………… | 500 |
| Midibbo, dheeh, asal, rinji iyo dheeh (sida dheeha birta) ….. | 50 |
| Kabo, suuman iyo boorsooyin maqaara iyo kuwa cinjira ….. | 100 |
| Buugag, wargeysyo (joornaallo) iyo wargeysyo waqti-waqti loo nashriyo ……………………………………… | 10 |
| Lugo baabuur iyo tubbbooyin ku dhex-jira iyo alaabo kale gacan lagu sameeyey …………………………………………………… | 150 |
| Maadooyin caaga iyo alaab laga sameeyey maadooyinkaas…….. | 50 |
| Hub iyo rasaas loo adeegsado ugaarsi ……………………………… | 50 |
| Qalab looga shaqeeyo guryo iyo jikooyin ………………………… | 100 |
| Maacuun dhoob ka sameysan iyo a gab (qalab) wax lagu cuno ………………………………… | 100 |
| Aaabad ay soo saaraan wershadaha quraaradaha iyo dhooba ….. | 100 |
| Bansii iyo alaabo kale oo laga soo saaro betroolka …………… | p.m. |
| Qalab makiinado sawir iyo filim-soo-saarid, makiinado, jihaasyo, beniikolayaal, xallaafyo, xaashiyo iyo kartoonno dareengeliyaala, xallafyo raajo iyo wax kale ………………….. | 50 |
| Filim qorsheyn oo xataa dalal saddexaad oo lagu tarjumay af talyaani …………………………………… | 60 |
| Badeecooyin kale …………………………………………. | 250 |
| Isugeyn | 8.000 |

**LIFFAAQ 2)**

**QAAIMOOYINKA LACAG-BIXINTA**

Lacagbixinaha la aqbalayo waa kuwa la xiriira:

1) alaabada si toos ah looga dhoofiyo hal dal loona dhoofiyo dal kale;
2) Kharashaadka raacsan is-dhaafsiga badeecooyin, ee u dhexeeya Itaaliya iyo Soomaaliya sida: kharashaadka daabulaadda, ee xagga dhulka, badda iyo hawada (marka lagu qaado maraakiibta ama diyaarado Talyaani iyo/ama Soomaaliyeed), bakhaar dhigidda, caymiska (abaalgud iyo magdhow), wareejinta badeeco min marka ilaa markab, iwm.;
3) Khashaad iyo khidmado bangiyeed, farqiyada sarrifka;
4) Kirooyin badeed, ee la xiriira dhaqdhaqaaq tooska iyo kan dadabka, ee xagga daabulaad loo adeegsado maraakiibta uu saaran yahay (dul babbanayo) calanka Talyaaniga, ayada oo ay ku jirto dan soomaaliyeed iyo maraakiib uu saaran yahay (dul babbanayo) calanka Soomaaliyeed, ayada oo ay ku jirto dan Talyaani;
5) wixii kharashaada oo ay ku bixiyaan dekedaha Talyaaniga ama dekedaha Soomaaliyeed, sida ay u kala horreeyaan, maraakiibta uu saran yahay (dul babbanayo) calanka Soomaaliyeed ama maraakiibta uu dul babbanayo calan Talyaani, sida:

— kharashaad shidaal-siin iyo canshuuraha dekadeed, saaka markabka dul saaran, lacagaha sida caadiga ah loogu hormariyey taliyayaasha maraakiibta, kharashaad dayactir ballaaran, dayactirka yar iyo dayactirka maraakiibta kor iyo hoosba, kharashaadka rarka iyo dejinta, iwm;

6) kharashaadka matalaadda, dacaayadda iyo kharashaadka xayeysiinta, khidmadaha iyo kharashaadka ka qeyb galka carwooyinka (bandhigyada);
7) kharashka caadiga ah ee dhalan-rogga, ka-shaqaynta, waabka, rakibidda, dayactirka;
8) kharashka iyo faa iidooyinka ka dhasha ganacsiga ku-hakadka;
9) xuquuqda patent iyo canhuur ruqsada xuquuqda fikirka, ruqsadda iyo sumadaha wershadda iwm;
10) rukunka wargeysyada, majallooyika iyo nashrinta majallooyinka xilliyeed;
11) Kharashka ku baxa ergooyinka diblomaasi iyo qunsuliyadeed, ee soomaaliya u jooga Itaaliya iyo kharashka ergooyinka diblomaasi iyo qunsuliyadeed, ee talyaaniga u jooga Soomaaliya, oo ay ku jiraan mushaharaadka iyo gunnooyinka la siiyo wakiillada diblomaasi iyo qunsuliyadeed, ee labada dal, xuquuqda qunsuliyadeed;
12) saamiyada ururrada; deeqaha la siiyo dugsiyada iyo Hayadaha dhaqanka, cilmiga, dalxiiska iyo Ispoortiga, ee labada dal midkood ku leeyahay kan kale, taageerada (qaaraanka) la siiyo Rugaha Ganacsiga;
13) lacag-bixinta la xiriira iskaashiga farsamada-filimaanta, ee u dhexeysa labada dal iyo isdhaafsiga filimada, xuquuqda ka faa'ideysiga filimada;
14) keydinta lacagaha ay muwaadiniinta Talyaaniga iyo kuwa Soomaalida ka sameeyeen shaqadooda gudaha Soomaaliya ama Talyaaniga, siday u kala horreeyaan, xitaa haddii si dhab ah dib loogu celiyo waddandooda;
15) kharashka safarkq, degaanka, waxbarashada, isbitaalka masaariifta iyo daryeelka;
16) tigidhada safarka dhulka, gaadiidka cirka iyo badda;
17) xuquuqda qoraaga iyo wixii hawlo kale oo lamida, ee la xiriira hantida fikir ahaaneed;

18) Mushaharka ku saleysan saacadaha shaqada, mushaharka góan ee billaha ah, hawlgabka, khidmad, abaalmarinno, iyo gunnooyinka caymiska bulsho, dakhliga deeqda, ee qofka inta uu nool yahay, dakhli hanti ka yimid;
19) cashuuraha, ganaaxa, kharashyada la xiriira garsoorka (maxkamadda), kharashaadka iyo diibaajiga la xiriira ee adeegyada guud;
20) kharashaadka iyo macaashka ka yimaada maamulka ganacsiga;
21) Saami qaybsiga laamaha, faracyada, iwm, ee kharashyada guud (kharashyada jahaynta) ee xarumaha dhexe;
22) dakhliga hantida, ee nooc kasta oo kale, gaar ahaan wixii dulsaara,qaybsi kiro;
23) baaqiga ka soomaamullada boostada, taleegramyada, trennada labada dal, ee u dhexeeya shirkadaha gaadiidka dadweynaha, oo ay ku jiraan shirkadaha duullimaadyada hawada;
24) baaqiga xisaabaadka dib-u-cayminta, marka lacagaha la xiriiro ay noqoneyso in lagu bixiyo Liire iyo Shilin soomaali ah;
25) magdhowyada caymis;
26) wixii ka yimid iibka xaraashka dadweynaha iyo qandaraasleyda gaarka ee burburka maraakiibta, diyaaradaha iyo baabuurta guud ahaan, iyo sidoo kale ashyáda iyo badeecooyinka laga soo badbaadiyey gaadiidkaas daabulaadda; nooc kasta oo kharashaadka, ee la xiriira maareynta iyo xaraashka iyo wixii dib loo helay, oo horey loo soo sheegay;
27) wareejinta raasamaalka, tabarucaadka, kaabista iyo nooc kasta oo kale oo gargaara, sabab kasta oo lagu yeeshay;
28) hawlgallada kale, ee lacag-bixinta oo ay ku heshiiyeen Xafiiska talyaaniga, ee saxxifyada iyo Bangiga Qaranka, ee Soomaaliyeed.

**LIFAAQA 3)**
Mogadiscio, li 1 luglio 1960

**MUDANE,**

Aniga oo tixraacaya cinwaanka 2aad, ee Mucaahadada Ganacsiga, lacag-bixinta iyo iskaashiga dhaqaale iyo farsamo, oo taariikhda manta kala saxiixdeen labadeenna dal, waxaa sharaf ii ah inaan ku ogeysiiyo in Xukuumadda talyaaniga, sí loo dhammeeyo hababka fulinta nidaamka lacag-bixinta, ee isku tuuridda guud, sida uu banneynayo qodobka 8, ee Mucaahadada la soo sheegay, waxa ay soo jeedineysaa:

1) Xafiiska talyaaniga, ee Sarrifka, wakiil ka u ah Xukuumdda Jamhuuriyadda Talyaaniga, waxaa uu magaca Bangiga Qaranka Soomaaliyeed, asaga oo wakiil u ah Xukuumadda Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, ku furayaa xisaab ah Liirada talyaaniga oo aan dulsaar dhaleyn, oo lagu magacaabo "Xisaab Guud", oo lagu shubi doono lacagaha loogu talagalay (loo qoondeeyey) in lagu nidaamiyo lacag-bixinta ay tahay in dadka dabiiciga ah iyo kuwa sharcigu sameeyey oo deggan Itaaliya, ay siinyaan, sida ay dhigeyso Mucaahadada kor lagu soo sheegay, dadka dabiiciga iyo shirkadaha deggan soomaaliya.
2) Deyn ahaan waxaa xisaabta ku qeexan barta 1) loogu qorayaa lacag-bixinta ay dadka dabiiciga iyo kuwa aan dabiiciga ahayn (shirkada ama hayadaha), ee deggan Soomaaliya, ay

tahay in ay siiyaan, sida ay dhigeyso Mucaahadada kor lagu, daddabiiciga ama kuwa aan dabiiciga ahayn (hayadaha), ee deggan Itaaliya.

3) “Xisaabta Guud” ee ku tilmaaman nuqdada 1) ma muujin karto haraa deynsane ana amaahle ee ka badan ha milyaard oo Lirada talyaaniga.

4) Xafiiska Talyaaniga, ee Sarrifka iyo Bangiga Qaranka Soomaaliya, waxa ay maalin kasta isku wargelinayaa wixii lacag ku shubid ah, oo loo soo sameeyey ayagaas, sí waafaqsan habka ku xusan ogeysiiska (wargelintan).

Lacagaha la siinayo dadka xaqa u leh, ee ku sugan labada dal waxaa loo habeyn doonaa iyada oo lagu xaddadi doono diyaarsanaanta lagu sheegay barta 3) - iyadoo loo eegayo habka isku xigidda helitaanka ogeysiiska bixinta, iyadoo ay u kala horreeyaan amarada bixinta.

5) Xagga ku-shubitaanka lacagaha gudaha Talyaaniga iyo lacag-bixinta gudaha Soomaaliya, sida ku cad barta 4) rogitaanka (beddelaadda) lacagta shin soomaaliga loo rogaayo( beddelaayo) Lirada talyaaniga iyo lidkeeda waxa uu ku dhici doonaa heerka sarrifka jira maalinta hawlga isku-rogga lacagaha. Sarrifkaas waxaa loo gooyaa sí ku miisaaman:

   A) wareegga dhexdhexaadka ah ee udhaxaysa xadadka faragelinta ee Xafiiska Talyaaniga, ee Sarrifka ee gorgortanka dollarka Mareykanka;
   B) Shilin Soomaaliga inta uu la eg yahay, marka loo eego Doolarka Mareykanka.

Sicirka sarrifka qaabkan loo gooyey waxaa wax laga beddeli doonaa mar kasta, ee uu isbedel ku yimaado heerka wareegga qiimaha isku-celceliska, ee sarrifka doollarka Mareykanka, gudaha Itaaliya iyo / ama inta uu Shinka Soomaaligu la egyahay, marka loo eego doollarka maraykanka, ee kor ku tilmaaman. Wax-ka-bedelkaan ayaa waxaa uu dhinacba dhinaca kale, isla markiiba, ogeysiin doonaa.

6) Iyada oo ku saleysan tacaamulka isku mida, madaxda awooda u leh waxa ay bixin doonaan, marka la raaco axkaamtasharciyada ka jira xagga sarrifka, oggolaanshaha lagama maarmaanka u ah bixinta lacagaha ku xusan qaaimada ku lifaaqan mucaahadada kor lagu soo xigtay.

Qaansheegtooyinka la xiriira isdhaafsiga badeecadaha iyo lacag-bixinnada kale waxaa lagu qaabeynayaa Liirada talyaaniga.

Iyada oo loo marayo "Xisaabta Guud" ee lagu qeexay barta 1), ayaa lagu nidaaminayaa xataa lacagaha ay labada jaho kala yeeshaan, marka la joogo taariikhda saxiixa mucaahadada nafteeda xagga hawlgallada la oggolaaday ka hor taariikhdaas.

7) xaasilka ka muuqan doona xisaabta isku-duuridda deymaha, ee uu Bangiga talyaanigu, asaga oo ku matalaayo Xafiiska talyaaniga, ee Sarriska, ku furay magaca Sanduuqa Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya, kadib markii la diiwaangeliyey lacag-bixinta labada jaho ee la habeeyay ka hor taariikhda saxiixa mucaahadada kor lagu soo xigtay, waxaa loo wareejin doonaa "Xisaabta Guud" oo lagu qeexay barta 1) ee Ogeysiiskan.

8) Xafiiska Talyaaniiga, ee Sarrifka, iyo Bangiga Qaranka Soomaaliyeed waxay si wada jir ah isugu afgarteen habraac farsamo, ee dabbiqaadda axkaamta sarci, oo dulucda u ah Ogeysiiskan (Wargelintan).

9) xaasika ka jiri doona «Xisaabta Guud» marka lagaro taariikhda dhammaadka nidaamka isku-tuuridda guud, ee lacagaha ay labada dhinac isku leeyihiin, waxaa badeecooyin ku dhammeynata (ku bixinaya) dalka deysanaha, muddo hal sana gudaheed oo ka bilaabata taariikhdaas.

Haddii la dhaafo muddaas, xaasilka (haraaga) weli jira waxaa sí dhaqsa loogu bixinayaa lacago beddelmi kara.

Fadlan Mudane ku soo dhowow sí aad iigu xaqiijisid, haddii Xukuummadaadu oggoshahay (waafaqsan tahay) arrimaha hore, aniga oo filaayo in Wargelintan iyo jawaabta aad iga siin dootid ay isku noqonayaan mucaahado ka dhexeysa labadeyna Xukuumadood, qaybna ka ah mucaahadada ganacsi ee lacag-bixin, iskaashi dhaqaale iyo farsamo oo la saxiixay taariikhda maanta.

Waxaa i farxad-gelineysa fursadda aan dib kuugu cusbooneysiinayo qadderintayda ugu sarreysa.

Madaxa Wefdiga Talyaaniga

**Carlo Russo**

MUDANE XILDH. **Dr. Maxamed Sheekh Gabyo**
Wadaxa Wefdiga Soomaaliya

Mugdhiso

**LIFAAQA 3)**
Moqdisho, 10[ka] Luulyo 1960

**MUDANE**,
waxaa sharafh in aan ku la socodsiiyo helitaanka Wargelitaadii, ee taariikhda manta una qorneyd sidan soo socota:
<<Ayada oo tixraacaayo Mucaahadada Ganacsiga, lacag-bixinta iyo iskaashiga dhaqaale iyo farsamo, oo taariikhda manta ay kala saxiixdeen labadeenna dal, waxaa sharaf ii ah inaan ku ogeysiiyo in Xukuumadda talyaaniga, sí loo dhammeeyo hababka fulinta nidaamka lacag-bixinta, ee isku tuuridda guud, sida uu banneynayo qodobka 8, ee Mucaahadada la soo sheegay, waxa ay soo jeedineysaa:

1) Xafiiska talyaaniga, ee Sarrifka, wakiil ka u ah Xukuumdda Jamhuuriyadda Talyaaniga, waxaa uu magaca Bangiga Qaranka Soomaaliyeed, asaga oo wakiil u ah Xukuumadda Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, ku furayaa xisaab ah Liirada talyaaniga oo aan dulsaar dhaleyn, oo lagu magacaabo "Xisaab Guud",a oo lagu shubi doono lacagaha loogu talagalay (loo qoondeeyey) in lagu nidaamiyo lacag-bixinta ay tahay in dadka dabiiciga ah iyo kuwa sharcigu sameeyey oo deggan Itaaliya, ay siinyaan, sida ay dhigeyso Mucaahadada kor lagu soo sheegay, dadka dabiiciga iyo shirkadaha deggan soomaaliya.
2) Deyn ahaan waxaa xisaabta ku qeexan barta 1) loogu qorayaa lacag-bixinta ay dadka dabiiciga iyo kuwa aan dabiiciga ahayn (shirkada ama hayadaha), ee deggan Soomaaliya, ay tahay in ay siiyaan, sida ay dhigeyso Mucaahadada kor lagu, daddabiiciga ama kuwa aan dabiiciga ahayn (hayadaha), ee deggan Itaaliya.
3) "Xisaabta Guud" ee ku tilmaaman nuqdada 1) ma muujin karto haraa deynsane ana amaahle ee ka badan ha milyaard oo Lirada talyaaniga.
4) Xafiiska Talyaaniga, ee Sarrifka iyo Bangiga Qaranka Soomaaliya, waxa ay maalin kasta isku wargelinayaa wixii lacag ku shubid ah, oo loo soo sameeyey ayagaas, sí waafaqsan habka ku xusan ogeysiiska (wargelintan).

Lacagaha la siinayo dadka xaqa u leh, ee ku sugan labada dal waxaa loo habeyn doonaa iyada oo lagu xaddadi doono diyaarsanaanta lagu sheegay barta 3) - iyadoo loo eegayo habka isku xigidda helitaanka ogeysiiska bixinta, iyadoo ay u kala horreeyaan amarada bixinta.

5) Xagga ku-shubitaanka lacagaha gudaha Talyaaniga iyo lacag-bixinta gudaha Soomaaliya, sida ku cad barta 4) rogitaanka (beddelaadda) lacagta shin soomaaliga loo rogaayo (beddelaayo) Lirada talyaaniga iyo lidkeeda waxa uu ku dhici doonaa heerka sarrifka jira maalinta hawlga isku-rogga lacagaha. Sarrifkaas waxaa loo gooyaa sí ku miisaaman:
   A) wareegga dhexdhexaadka ah ee udhaxaysa xadadka faragelinta ee Xafiiska Talyaaniga, ee Sarrifka ee gorgortanka dollarka Mareykanka;
   B) Shilin Soomaaliga inta uu la eg yahay, marka loo eego Doolarka Mareykanka.

Sicirka sarrifka qaabkan loo gooyey waxaa wax laga beddeli doonaa mar kasta, ee uu isbedel ku yimaado heerka wareegga qiimaha isku-celceliska, ee sarrifka doollarka Mareykanka, gudaha Itaaliya iyo / ama inta uu Shinka Soomaaligu la egyahay, marka loo eego doollarka maraykanka, ee kor ku tilmaaman. Wax-ka-bedelkaan ayaa waxaa uu dhinacba dhinaca kale, isla markiiba, ogeysiin doonaa.

6) Iyada oo ku saleysan tacaamulka isku mida, madaxda awooda u leh waxa ay bixin doonaan, marka la raaco axkaamtasharciyada ka jira xagga sarrifka, oggolaanshaha lagama maarmaanka u ah bixinta lacagaha ku xusan qaaimada ku lifaaqan mucaahadada kor lagu soo xigtay.

Qaansheegtooyinka la xiriira isdhaafsiga badeecadaha iyo lacag-bixinnada kale waxaa lagu qaabeynayaa Liirada talyaaniga. Iyada oo loo marayo "Xisaabta Guud" ee lagu qeexay barta 1), ayaa lagu nidaaminayaa xataa lacagaha ay labada jaho kala yeeshaan, marka la joogo taariikhda saxiixa mucaahadada nafteeda xagga hawlgallada la oggolaaday ka hor taariikhdaas.

7) xaasilka ka muuqan doona xisaabta isku-duuridda deymaha, ee uu Bangiga talyaanigu, asaga oo ku matalaayo Xafiiska talyaaniga, ee Sarriska, ku furay magaca Sanduuqa Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya, kadib markii la diiwaangeliyey lacag-bixinta labada jaho ee la habeeyay ka hor taariikhda saxiixa mucaahadada kor lagu soo xigtay, waxaa loo wareejin doonaa "Xisaabta Guud" oo lagu qeexay barta 1) ee Ogeysiiskan.

8) Xafiiska Talyaaniiga, ee Sarrifka, iyo Bangiga Qaranka Soomaaliyeed waxay si wada jir ah isugu afgarteen habraac farsamo, ee dabbiqaadda axkaamta sarci, oo dulucda u ah Ogeysiiskan (Wargelintan).

9) xaasika ka jiri doona «Xisaabta Guud» marka lagaro taariikhda dhammaadka nidaamka isku-tuuridda guud, ee lacagaha ay labada dhinac isku leeyihiin, waxaa badeecooyin ku dhammeynata (ku bixinaya) dalka deysanaha, muddo hal sana gudaheed oo ka bilaabata taariikhdaas.

Haddii la dhaafo muddaas, xaasilka (haraaga) weli jira waxaa sí dhaqsa loogu bixinayaa lacago beddelmi kara.

Fadlan Mudane ku soo dhowow sí aad iigu xaqiijisid, haddii Xukuummadaadu waafaqsan tahay arrimaha hore, aniga oo filaayo in Wargelintan iyo jawaabta aad iga siin dootid ay isku noqonayaan mucaahado ka dhexeysa labadeyna Xukuumadood, qaybna ka ah mucaahadada ganacsi ee lacag-bixin, iskaashi dhaqaale iyo farsamo oo la saxiixay taariikhda maanta.>>

Aniga oo ka jawaabaaya, waxaa sharaf ii ah,MUDANE, in aan kugu wargeliyo in Xukuumaddeydu ay sì buuxda u waafaqsan tahay arrimaha lagu soo bandhigay Qoraalkaas wargelinta.

Waxaa i farxad-gelineysa fursadda aan dib kuugu cusbooneysiinayo qadderintayda ugu sarreysa.

Wadaxa Wefdiga Soomaaliyeed
MUDANE XILDH. **Dr. Maxamed Sheekh Gabyo**

MUDANE XIL. **Carlo Russo**
Madaxa Wefdiga Talyaaniga

Mugdhiso

**MUCAAHADO ADEEGYADA DIYAARADAHA EE KA DHEXEYSA ITAALIYA IYO SOOMAALIYA**

Xukuumadda talyaaniga iyo Xukuumadda soomaaliyeed, ayaga oo ka shidaal-qaadanaya rabitaankooda ah in xoojiyaan xiriirka labada dal, ayaga oo dhidibbada u taagaaya adeegyo diyaaradeed, oo ka dhex shaqeeya labadooda dhul, waxa ay ku heshiiyeen arrimaha soo socda:

**Qod. 1**

Marka la eego Mucaahadadadan,haddii qoraalka aysankamuuqan wax ka duawan:

A) ereyga "heshiiska waxaa loola jeedaa Heshiiska ku saabsan Duulimadka Rayidka, ee Caalamiga, oo saxiixa loogu furay magaalada Shikaago 7dii disember 1944 , ayna ku jiraan yihiin dhammaan qoraallada ku dheggen oo la oggolaaday, ayaga oo ku saleysan qodobka 90, ee Heshiiska la soo sheegay iyo wax-ka-beddel kasta oo khuseeya qoraallada ku dheggan ama Heshiiska, kuna salleysan qodobbada 90 iyo 94 oo heshiiska la xiriira;
B) ereyga "Madaxda Duulimaadka Diyaaradaha" waxaa loola jeedaa, xagga Itaaliya, Wasaaradda Difaaca Cirka, Agaasinka Guud ee Duulimaadka Rayidka iyo Dhaqdhaqaaqa Hawada, iyo xagga Soomaaliya, Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Isgaarsiinta iyo labada xaaladoodba qof kasta ama Hay'ad uxilsaaran Hawlaha ay hada qabtaan Hay'adaha korlagu soo sheegay;
C) ereyga "Shirkadda loo xilsaaray waxaa loola jeedaa Shirkadda oo uu dhinac ka mid ah dhinacyada Heshiiska u xilsaarato, ayada oo qoraal lagu wargelinay dhinaca kale ee heshiiiska, si waafaqsan qodobka 3, ee Mucaahadada, sí loo fuliyo adeegyada diyaaradaha dul maraya Khadadka lagu caddeeyay Wargelintaas;
D) ereyada ah "Dhul iyo Adeeg Diyaaradeed" "adeeg Diyaaradeed oo Caalami ah" iyo "hakad aan loola jeedin dhaqdhaqaaq" waxa ay kala leeyihiin macnaha lagu siiyay qodobbada 2 iyo 96, ee Heshiiska.

**Qod. 2**

1. Xuduudda ku dabbiqidda adeega diyaaradeed, oo dejisay Mucaahadadan axkaamta Heshiiska, xagga wixii ku saabsan heshiiskaas, inkasta oo ayan Soomaaliya weli ku biirin waxa uu ku dhaqangelayaa qaabka uu hadda uga dhex jiro dhinacyada, sida taahoo ay yihiin qeyb ka mida Mucaahadada inta lau guda jiro;
2. - Haddii ay dhacdo in Mucaahadada in wax ka bddel lagu sameeyo Mucaahadada la soo sheegay oo ay markaas Itaaliya ku biirto, xukumadda talyaaniga waxa ay wax ka

beddeladaas hor dhigi doontaa Xukuumadda Soomaaliya, si wadajir la isugu afgarto in lagu dabbaqo xiriirrada ay nidaaminayso Mucaahadada.

**Qod. 3**

1. Dhinac kasta waxa uu dhinaca kale u ogglaanayaa xuquuqda lagu tilmaamay Mucaahadada, si loo abuuro, loona sameeyo adeegyo diyaaradeed ee la saaro khadadka lagu cayimay qaybaha loogu talagalay, ee qaa'imada khadadka (hadda wixii ka dambeeya "adeegyada lagu heshiiyay" iyo "khadadka la caymay";
2. Si waafaqsan Axkaamta Mucaahadadan, shirkadaha uu dhinac kasta cayimay waxay yeelanayaan, inta ay ku gudajiraan fulinta adeegyada lagu heshiiyey, xuquuqda soo socda:
    A) In ay dul duulaan ayagoon hakad sameyn,  dhulka dhinaca kale;
    B) Inay ku deggaan dhulka dhinaca kale, sababo aan la xiriirin dhaqdhaqaaq dartood;
    C) in ay dhulka dhinaca kale kaga hakadaan baro caadiyan lagu cayimay khadka, si loo saaro ama loogu dejiyey rakaab, waraaqaha boostada iyo/ama badeecooyinka leh ujeeddo ganacsi.
3. ma leh (ma jirto) Axkaam ku jirta faqradda2, ee qodobkan oo loo qaadan doono inau shirkad uu leeyahay dhinac, xaq u siinaysa in dhulka dhinaca kale ka qaaddo rakaab, badeecooyin iyo/ama boost, oo lagu daabulo lacag ama kiro (nooli) oo kusocda bar kale oo ka mida dhulka dhinaca kale, ee heshiiska.

**Qod. 4**

1. Dhinac kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu qoraal dhinaca kale ugu cayimo hal shirkad oo kaliya, si ay uga hawlgasho adeegyada lagu heshiiyay ee ku duulaya khadadka loo cayimay;
2. Marka u helo wargelinta cayimaadda, kuna xiran Axkaamta ku jirta faqradaha 4 iyo 5, ee Qodobkan, dhinaca kale waa in uu shirkadda la cayimay, daah la'aan, siiyo ruqsadda la xiriirta hawlgalka;
3. Madaxda Hay'adda duulimaadka hawada, ee dhinac ka mida dhinacyada Mucaahadada, waxay weydiisan karaan in shirkadda uu dhinaca kale soo cayimay, ay leedahay kafaa'ada looga baahan yahay, si ay u buuxiso shuruudaha ay, sida caadiga ah, saarayaan sharciyada iyo xeerarka, ayna si maangal ah u dabbaqaan ayagaas, si waafaqssan Axkaamta Heshiiska, xagga ka hawlgalka adeegyada diyaaradaha caalamiga, ee ganacsiyeed;
4. Mar allaale marka ay oofiso axkaamta ku jirta faqradaha 1 iyo 2, ee qodobkan shirkadda la cayimay, ruqsaddana la siiyey, waxa ay bilaabi kartaa in ay ka hawlgasho adeegyada lagu heshiiyey; hase yeeshee waa in aan laga hawlgelin adeeg, haddii aysan dhaqangal ahayn, xagga adeeggaas, sicirrada (tariifooyinka) la gooyey ayada oo la raacaayo axkaamta qodobka 7aad, ee mucaahadadan;
5. Dhinac kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu diido. Ka noqdo, joojiyo (laalo) ka faa'iidaysiaga ay shirkadda ka faa'iidaysanayso xuquuqda ku cayiman farqadda 2, ee Qodobka 3, ee Mucaahadadan ama uu ku xiro shuruudaha uu isleeyahay waxay lagama maarmaan u yihiin, sida ay shirkadda ugu faa'iidaysanayso xuquuqdaas, marka kasta oo ay shirkadda ka baaqato in ay u hoggaansanto sharciyada iyo xeerarka dhinaca bixiyay xuquuqdaas amaba ka baaqsaday in uu u shaqeeyo (u hawlgalo), si waafaqsan shuruudaha ay u dejisay Mucaahadada, mararka uu dhinacaas asoo sheegay uusan hubin

hantida nuxur ahaaneed iyo xakameynta (kontoroolka) gacanta dhinaca cayiman shirkadda ama Muwaadiniintiisa.

**Qod. 5**

1. Shidaalka, saliidaha wax lagu dufaneeyo, cadadka beddelka, wixii qalaba, ee saaran diyaaradda dusheeda oo la geliyo dhulka dhinaca kale ama lagu qabtay, dhulkaas gudihiisa, oo dulsaaran diyaaradaha uu cayimay dhinaca kale, sì loogu adeegsado isticmaalka gaarka, ee diyaaradahaas, waxaa laga dhaafayaa canshuurta dekadeed iyo culeys kastoo canshuureed, ayada oo la dhowraayo habraaca dekedaha, oo u kala degsan Dawladahooda;
2. Shidaaalka, saliidaha wax lagu dufaneeyo, cadadka beddelka, wixii qalab ah iyo saad ah oo caadiyan dul saran diyaaradaha shirkadaha uu soo cayimay dhinaca kale, oo ruqsada u haysta in ay fuliyaan adeegyada lagu heshiiyeyoo caadiyan dulsaaran diyaaradaha shirkadaha ee cayimay dhinaca kale, oo loo ruqseeyey in ay ka wada hawlgalaan adeegyada lagu heshiiyay, waxaa laga dhaafay, dhulka dhinaca kale dushiisa, canshuurta dekadda, iyo wixii culays canshuur ah, ee kale hadii alaabahaas la soo sheegay ay yihiin kuwo ay isticmaalayaan isla diyaaradahaas, inta ay ku gudajireen duulimaadyada dhulka la soo sheegay dushiisa ah;
3. Shidaala, saliidaha wax lagu dufaneeyo, cadadka beddelka, wixii qalab iyo saad caadiya, oo dusha diyaaradaha saran, oo leh canshuur-dhaafka kor lagu soo sheegay, lama soo dejin karo hadii aan oggolaansho laga heysan madaxda dekedaha, ee dhinaca kale. Haddii alaabadaas aanan la isticmaali karin waa in dib loo dhoofiyaa, inta laga dhur-sugaayo isticmaalkooda iyo dib-u-dhoofintoodana, ayagaas waa in ay ku hoos-jiraan kontoroolka dekedda;
4. Diyaaradaha ay shirkadahauu soo cayimay dhinaca kale, ku fulinayaan adeegyada lagu heshiiyay , ee khadadka loo cayimay dushooda oo dulmaraya, ku degaya ama ka duulaaya dhulka dhinaca kale, waxa ay dhulkaas ku leeyihiin kadhaafid ku meelgaar ah, ee xuquuqda dekadaha, kharashka kormeerka iyo wixii kale oo culeys canshuureed ah, ayada oo la dhowraayo habraaca dekadeed, ee dhinaca kale.

**Qod. 6**

1. Waxaa jiri doona fursado cadaalad ah oo loo siman yahay oo loogu talo galay shirkadaha labada dhinacba in ay adeegyada lagu heshiiyey ka fuliyaan khadadka la cayimay dushooda;
2. Inta lagu guda jiro fulinta adeegyada lagu heshiiyey, shirkad dhinanac kasta waa in ay tixgelisaa danaha shirkadda dhinaca kale si aysan u faraglin adeegyada ay middaan dambe ka fuliso dhammaan ama qeyb ka mid ah isla hal khad;
3. Adeegyada lagu heshiiyey oo ay fuliso shirkadda loo cayimay waa inay si macquul ah ula ulatillaaba-qaadaan baahiyaha dadweynaha gaadiidka ku goosha khadadka la cayimay, waana in ujeeddadooda ugu oo leeyihiina tahay in ay la yimaadaan awood maangal ah oo ay ku daboolaan baahiyadan jira iyo kuwa la filayo karo mustaqbilka, oo dhexmarta dhulalka dhanacyada Mucaahadada;
4. Soo bandhigida awoodda gaadiidka daabulidda rakaabka, alaabada iyo boosta laga raray ama lagu dejiyey baro (goobo) ka mida ku dhirirka khadadka laga cayimay dhulalka Dawlado saddexaad waa inay waafaqaan mabda'a guud ee ah in Awooddaas la soo bandhigayo tahay mid ku dheellitiran:

A) Baahiyaha dhaqdhaqaaqa gaadiid ee ka jirta waddanka laga imanayo iyo kan loo socdo dhexdooda ah;
B) Baahida gaadiidka ee aagga ay shirkaddu ka fuliso howlaheeda ka dib markii ay tixgeliso adeegyada kale ee gaadiidka ee ay fuliyaan shirkadaha dawladaha qaybo ka mida isla aagga;
C) baahiyaha adeegyada aradaha u socda meelaha fog.

**Qod. 7**

1. Sicirrada lagu dabbaqayo doono adeegyada lagu heshiiyay waa in loo dejiyaa ilaa xad macquul ah, iyada oo la tixgalinayo dhammaan arrimaha ugu muhiimsan, ee la xiriira, oo ay ku jiraan kharashka uu ku kacayo adeegga, faaiido maangal ah iyo astaamaha adeegga (sida "hal-beegyo" xawaaraha iyo raaxada iyo ayada oo tixgelin la siinaayo xataa sicirka (sicirrada) ay shirkadaha kale ku dabbaqaan khad kasta oo cayiman;
2. Sicirrada (sicirka) ku xusan faqraddab 1, ee qodobkan, waa kuwo ay dhexdooda heshiis kaga gaareen, xagga khad kasta oo mucayana, shirkadaha la soo cayimay (magacaabay) ee daneynaya (haddii loo arka inuu u haboon yahay wadatashi lala yeesho shirkadaha ka hawlgala khadka oo dhan ama qayb ka mida). Heshiiskaas waa in lagu gaaro nidaamka ay xagga sicirrada (tariifooyinka) u degsadeen ururada gaadiidka diyaaradaha, ee caalamiga ah. Sicirrada sidaas loogu heshiiyay waa in la mariyo oggolaanshaha madaxda Hayadda Duullimaadyada diyaaradah ee l abada dhinac;
3. Haddii shirkadaha la cayimay ay go'aan ka gaari waayaan sicir oo kasta ama haddii sabab kasta kale darteed, lagu heshiin kari waayo, ayada oo la raacayo axkaamta faqradda 2, ee qodobkan, Madaxda Hay'adda Duulimaadka Diyaaradaha, ee dhinacyada waa in ay raadiyaan in ay dhexdooda go'aan wadjir ah kaga gaaraan sicirka (tariifooyinka);
4. Haddii madaxa Hay'adaha Duulimaadka ay ku heshiin waayaan oggolaanshaha sicir kasta oo loo soo bandhigay, sida ay qabto faqradda 3, khilaafka waa in loo xalliyo si waafaqsan axkaamta qodobka 8, ee Mucaahadada;
5. A) Ma jiro sicir (tariifi) dhaqangelayo, haddii Madaxda Hayadda Duulimaadyada Hawada dhinacyada midkood uusan ka biyo-diidin, haddii aysan dhicin xaaladda ay qeexayaan axkaamta faqradda 3, ee qodobka 8, ee Mucaahadadan;
   B) Haddii la dejiyo, tariifooyinka (sicirrada), si waafaqsan axkaamta qodobkan, tariifooyinka (sicirrada) waa in ay dhaqangal ahaadaan ilaa laga goynaayo tariifooyinka (sicirro) cusub, si waafaqsan axkaamta qodobkan.

**Qod. 8**

1. Haddii ay dhacdo in murran, ka dhex dhasho dhinacyada, la xiriira fasiraadda iyo dabbaqidda Mucaahadadan, dhinacyadu waa in ay, ugu horeyntii, murankaas ku xaliyaan wadaxaajood;
2. Haddii dhinacyadu awoodi waayaan in ay heshiis ku gaaraan wadaxaajood:
   A) ayagu waxay karaan inay u gudbiyaan (u dhiibaan), xagga xallinta, Maxkamad dhexdhexaadin ama qof kale ama hay'ad, oo ay magacaabeen ayaga oo heshiis ku ah; ama;
   B) Haddii ay taas ku heshiin waayaan ama, haddii ay gartaan inay muranka u gudbiyaan Maxkamad Dhexdhexaadin, ayagu ay ku guulaysan la'yihiin in ay heshiis ka gaaraan, xagga wixii ku saabsan sida loo dumayo (loo dhisaayo), dhinac kasta waxaa uu go'aanka xallinta ka dalbi karaan (weydiisan karaan) Maxkamad kasta oo awood u leh, taas oo mar dambe laga dhex dhisi karo Ururka Duulimaadka Rayidka, ee

Caalamiga (ICAO), ama haddii la waayo kaas, Golaha Ururka Duulimaadka Rayidka Caalamiga.

3. Dhinacyadu waxa ay ballanqaadayaan in ay u hoggaasamayaan dhamaan go'aanada la qaatay, ee wafaqsan faqradda 2, ee Mucaahadadan;
4. haddii iyo ilaa marka mid kasta oo ka mida dhinacyada, ama shirkadda uu cayimay mid kasta oo ka mida dhinacyada, uu raaci waayo go'aanka la gaaray, si waafaqsan faqradda 2, ee qodobkan, dhinaca kale waxa uu karaa (u banana) inuu xaddido, joojiyo (laalo) uuna la noqdo xaq kasta ama bursiino kasta, ee uu ku siiyay, si ku saleysan Mucaahadadan, dhinaca kale ama shirkadd uu soo cayimay midkaan dambe.

**Qod. 9**

1. Haddii dhinacyada midkood uu doono in uu wax ka beddelo axkam kasta oo ka mida Mucaahadadan, wax-ka-bedelkaas, haddii ay dhinacyada dhexdooda kaga heshiiyeen, waxa uu dhaqangelayaa ka dib marka lagu xaqiijiyo isdhaafsi Qoraallo wargelin (qoraallo wargelin);
2. haddii dhinacyada midkood uu arko in ay haboon tahay in uu wax ka beddelo qaa'imooyinka khadadka, ee Mucaahadadan, wax-ka-beddelkaas, haddii dhinacyada Mucaahadada ay dhexdooda kaga heshiiyaan, waxa uu dhaqangelayaa marka lagu xaqiijiyo isdhaafsi (isweydaarsi) qoraallo wagelineed;
3. Haddii la gunto (galo) heshiis guud,ee wadar-dhinacle ah, oo ku saabsan Gaadiidka diyaradaha, oo ay ku biireen dhinacyada, Mucaahadadan wax baa laga beddelayaa, sì loo waafajiyo axkaamta heshiiskaas.

**Qod. 10**

Mucaahadadan waxa ay dhaqangelaysaa isla waqtiga uu dhaco isdhaafsiga waraaqaha meelmarinta oo ku dhacaya rooma isla goorta ay suurtagasho.
Dhinac kasta oo ka mida dhinacyada waxa uu karaa in uu mar kasta ogeysiinayo dhinaca kale in uu soo afjarayo Mucaahadadan, ogesiiskaas waa in isku-mar la gaarsiiyo Ururka Duulimaadyada Rayidka ee Caalamiga. Marka la sameeyo gaarsiintaas, Mucaahadadan waxay dhammaaneysaaa laba iyo toban bilood kaddib taariikhda helitaanka gaarsiinta xagga dhinaca kale, ee Mucaahadada; haddii gaarsiintaas aan lala noqon, ayada oo heshiis lagu wada yahay, inta aysan dhicin muddadaas. Haddii dhinaca kale ku doodin in uusan helin wargelinta, waxa loo qaadanayaa in uu warglinta helay shan iyo toban maalmood ka dib, helitaankaas Ururka Duulimaadyada Rayidka ee Caalamiga.
Dadka hoos ku qoran oo awoodda buuuxa leh, oo sì sharci ah idin uga kala heysta xukuumadahooda waxay saxiixeen Mucaahadadan, waxayna saareen Shaabbadahooda.
Waxaa lagu sameeyay Muqdisho 1$^{da}$ Luulyo 1960, ayada oo ka kooban laba nuqul.

Dhanka Jamhuuriyadda Talyaaniga
**Carlo Russo**

Dhanka Jamhuuriyadda Soomaaliya
**Maxamed S. Gabyo**

**JADWALKA KHADADKA**

**Khadadka Talyaaniga:**

Hakayada Itaaliya- Ateene iyo/ama Beyruud, iyo/ama Qaahira, iyo/ama Jidda, iyo/ama Kartuum, iyo ama Casmara, iyo/ama Addis-Ababa, iyo/ama Muqdisho, iyo/ama ka shishe xagga Afrikada Koonfureed, iyo/ama Afrikada Galbeed iyo/ama Bariga Dhexe iyo kan Fog.
Iyada oo khiyaar loo leeyahay in hakadyo qaar ama dhamaan la iska dhafo

**Khadadka Soomaaliyeed:**

Khadadka Soomaaliyeed waxaa lagu heshiin doonaa marka Xukuummada Soomaaliyeed go’aansato in ay bilowdo adeegyada.

## MUCAAHADA LACAGTA EE KA DHEXEYSA ITAALIYA IYO SOOMAALIYA

Xukuumadda talyaaniga iyo Xukuumadda soomaaliyeed, ayaga oo ka shidaal-qaadanaya wada- shaqeynta dhaw ee ka dhex jirta labada Dal, si loo dhameeyo arrimaha ku cad nuqdada 5, ee isdhaafsiga qoraallada wargelineed ee la xiriira wareegga lacagaha, ee Soomaaliya gudaheeda, oo lagu sameeyay Muqdisho 1 Luulyo 1960 - arrin kasta oo kale ee ku saabsan isla wareegga lacagta iyo sii-wareejinta hawlaha sanduuqa wareegga lacagaha, ee Soomaaliya,
Waxa ay ku heshiiyeen arrimaha soo socda:

### Qod. 1

Ayada oo ay sidooda u taagan yihiin arrimaha looga heshiiyay is-dhaafsiga qoraallada wargeli, ee 1da Luulyo 1960, oo loogu tilmaamay hordhaca (ararta) oo gaar ahaan la xiriira: dhamaadka ka-shaqaynta Soomaaliya Gudaheeda, ee Sanduuqa Wareegga Lacagaha, wareejinta uu Sanduuqaas, la sheegay, ku wareejinayo Bangiga Qaranka Soomaakiyeed, oo laga bilaabay 1da Luulyo 1960, la wareegay hawlaha Hayadda soo-saaridda, ee Soomaaliya, dakhliyada soo socda:

— Wareega Lacagaha, ee Soomaaliya gudaheeda, ee xaasilka ahaa ilaa habeenka 30ka Juunyo 1960, lana xiriira keydka sharciga, ee dammaanadda;
— Naaqusqaanta khasnadda, oo ku liisgareeysan barta (nuqdadda) 3, ee isdhaafsiga qoraallada wargelinta ee hore loo soo xusay iyo dhaqdhaqaaqa khasnadda xagga qadder u dhigma iyo weliba bilaash u bixinta keyd lacago xaashi iyo googòa (macdanta)) oo shilin soomaaliga iyo Qalab lagu soo saaro lacagta go’go’a ah iyo xaashiyaha naftooda iyo jeegagga.

### Qod. 2

Si lacagta loogu hayo heerkeeda degganaansho iyo sugnaan ee waqtiga la joogo, kuwaas oo lacagta ka dhigaya lacag adag iyo aalad wax-ku-oola oo loo adeegsado xoojinta dhaqaalaha Soomaaliya, Sanduuqa wareega Lacagta, ee Soomaaliya, waxa uu siinayaa Bangiga Qaranka Soomaaliyeed, ayada oo kaalmo iyo taageero khaasa uga dhigayo isla Hayaddaas, qadar lacag ah oo dhan 6 milyan oo Shilin Soomaali ah.

Isla sanduuqa waxa kale ee uu bilaash (lacag la’aan) ku siinayaa Bangiga Qaranka, ee Soomaaliya, milkiyadda hanti maguurtada ah, ee uu ku leeyahay Soomaaliya gudaheeda, iyo qalabka la xiriira, oo isticmaalkiisa ku meelgaarka horey loogu oggolaaday is-dhaafsiga Qoraallada wagelinta oo horey loo soo xusay.

### Qod. 3

Xagga wixii la xiriira waxyaabaha horey loo soo sheegay, Bangiga Qaranka Soomaaliyeed waxa uu Sanduuqa wareega lacagta ee Soomaaliya, ka dhaxlayaa xaq iyo waajib kasta iyo damaca la xiriira hawlaha uu Sanduuqaas ka qabtay Soomaaliya ka Hayad soo-saarid ahaan.

**Qod. 4**

Waxaa loo qaadanayaa in Mucaahadadan lagu dhameeyay laguna nidaamiyay xiriirada ka dhexeeya labada Xukuumadood, ee khuseeya xagga wareejinta lacagta, ee Soomaaliya iyo dhamaadka hawlaha Sanduuqa, ee Soomaaliya gudaheeda.

**Qod. 5**

Xukuumadda Soomaaliyeed iyo Xukuumadda Talyaaniga waxay fulinta arrimaha lagu jideeyey Mucaahadadan u wakilayaan, sida ay u kala horeeyaan, Guddoomiyaha Sanduuqa wareega lacagta, ee Soomaaliya ama qof beddelkiisa ah iyo Guddoomiyaha Bangiga Qaranka, ee Soomaaliyeed ama qof beddelkiisa ah.

**Qod. 6**

Mucaahadadan waxay dhaqangelaysaa marka la is-dhaafsado Qoraallada wargelinta, ee la xiriira meelmarinta, oo lagu qaban doono Muqdisho sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtagalka.

Wakiillada awooda buuxda leh, ee ka kala socda dhinac, waxa ay saxiixeen Mucaahadadan, waxayna saaren shaabbadahooda.

Waxaa lagu sameeyey Rooma, 23kii Nofembar 1960, ayada oo laba nuqul ah.

Dhanka Xukuumadda
**Sheekh Cali Jimcaale**

Dhanka Xukuumadda Talyaaniga
**Segni**

Muqdisho, 1da Luulyo 1960

**MUDANE**,

waxaa sharaf ii ah aan kugu wargeliyo arrimaha soo socda:

1.Dowladda Talyaanigu waxay diyaar u tahay inay, markii la gaaro taariikhda 1da Luulyo 1960, ku wareejiso dowladda Soomaaliya, taasoo gebi ahaan qaadi doonta mas'uuliyadda la xiriirta, waareegga lacagta Soomaaliga ee uu soo saaray Sanduuqa Wareegga Lacagta ee Soomaaliya, oo xaasilka ah fiidnimada 30ka bisha Juun, ee socota.

Xagga ballanqaadka kor ku xusan, Dowladda Talyaanigu waxay diyaar u tahay inay ku wareejiso Dowladda Soomaaliya kaydadka dahabka iyo qalinka iyo lacagta qalaad oo uu haysto isla Sanduuqa maalintaas, kaydadkaas oo boqolkiiba boqol ah dammaanadda wareegga lacagta, xagga lacagta macdanta, qiimaha ugu sarreeya, ee soo saaridda lacagtaas marka loo eego kharashka.

2. Si loo fuliyo waxayaaba lagu tilmaamay faqradda 1, Dowladda Soomaaliya waa in ay tilmaanto Hay'adda ay ayadu u wakiilatay in ay qabato maamulka wareegga lacagaha iyo in ay la wareegto kaydadka dammaanadda, ee la xiriira.

Dhinaceeda, dawladda Talyaanigu waxay awaamir siineysaa Sanduuqa Wareegga lacagaha ee Soomaaliya, xagga xil-wareejinta lagama maarmaanka ah.

3. Xagga wixii la xiriira hawlaha Sanduuqa oo Soomaaliya gudaheeda ka ah machad soo-saarid lacag, marka la gaaro taariikhda horey loo soo sheegay, Sanduuda Wareegga Lacagta, ee Soomaaliya, waxa uu u diyaargaroobi doonaa in uu Hayadda soomaaliyeed, ee ku xusan faqradda 2, ku wareejiyo waxyaabaha soo socda oo lagu leeyahay Waaxdiisa bangiga:

1. deyn aragti ku-bixina;
2. dhigaal xisaab socota;
3. dhigaal keydsi;
4. xisaab socota ee xiran;
5. balanqaadyo lacag qalaad iyo rahan lacageeda..

Xagga wajihidda nusqaantaas, Sanduuqa Wareegga Lacagta, ee Soomaaliya, waxa uu Hayaddaas kor lagu soo sheegay ku wareejin doonaa hantida iyo xuquuqda ay leedaha Waaxdiisa bangiga in u dhiganta.

Isla waqtiga wareejinta hantida iyo deymaha lagu xusay faqradi hore, waxaa lala wareejin doonaa xaddiga , xagga xisaabinta hantida iyo deymaha la xiriira amarada bixinta ee kala deyn-bixidda, lacagta laga shubayo shirkada dhismaaya, kambiyaalayaasha ku jira bortafolyada (gudaha iyo dibedda) oo lo ohayo cid saddexaad xagga soo xareynta, iyo weliba xaddiga xoolaha loo haayo xisaabtanka ka dhacaya Soomaaliya.

4. Si Hayadda soomaaliyeed, ee kor ku xusan, loogu suurtageliyo in ay danaheeda qabsato, Sanduuqa Lacagta, ee Soomaaliya, waxaa waxa uu diraarinaya, ayada isticmaal ku meel gaara loo siinayo Hayadda nafteeda, hantida ay ku yeelay (ku haysatay) dhulka Soomaaliyeed. oo leh wixii qalab la xiriira. Kaydka lacagta shilin soomaaliga xaashida iyo googóa macdanta – iyo sida xataa qalabka soo-saaridda (sameynta) lacata ah macdanta iyo xaashida naftooda, iyo weliba jeegagga . laakiin waxaa loo wareejinayaa sí abad ah.
5. Arrin kasta oo kale oo la xiriirta Wareegga lacagta iyo wixii dambe, oo ah wareejin siyaadada iyo nusqaanta Sanduuqa, waxaa lagu dhammeynayaa mucaahado dhexmarta labada Xukuumadood.

Mudane, fadlan noo xaqiiji in Xukuumaddaada ay waafaqsan tahay arrimaha hore, annaga oo dhowreyna in qoraalkan wargelinta iyo jaabta aad, Mudane, Noo soo gudbin doonto ay isku noqon doonaan mucaahado u dheysa labadeena Xukuumadood.

Waxaa farxad ii ah fursadda aan, Mudane, kuugu cusbooneysiinayo qaddarinteyda ugu sarreysa.

Madaxa Wefdiga Talyaaniga
**Carlo Russo**

Ku Mudane Xil. **Dr, Maxamed Sheekh Gabyo**
Madaxa Wefdiga Soomaaliya

Muqdisho, 1da Luulyo 1960

**MUDANE,**

waxaa sharaf ii ah aan ku la socodsiiyo in aan helay Qoraalkaadii wargelinta, ee taariikhda manta, ee u qornaa sidan:

1.Dowladda Talyaanigu waxay diyaar u tahay inay, markii la gaaro taariikhda 1da Julaay 1960, ku wareejiso dowladda Soomaaliya, taasoo gebi ahaan qaadi doonta mas'uuliyadda la xiriirta,

waareegga lacagta Soomaaliga ee uu soo saaray Sanduuqa Wareegga Lacagta ee Soomaaliya, oo xaasilka ah fiidnimada 30[ka] bisha Juun, ee socota.

Xagga ballanqaadka kor ku xusan, Dowladda Talyaanigu waxay diyaar u tahay inay ku wareejiso Dowladda Soomaaliya kaydadka dahabka iyo qalinka iyo lacagta qalaad oo uu haysto isla Sanduuqa maalintaas, kaydadkaas oo boqolkiiba boqol ah dammaanadda wareegga lacagta, xagga lacagta macdanta, qiimaha ugu sarreeya, ee soo saaridda lacagtaas marka loo eego kharashka.

2. Si loo fuliyo waxayaaba lagu tilmaamay faqradda 1, Dowladda Soomaaliya waa in ay tilmaanto Hay'adda ay ayadu u wakiilatay in ay qabato maamulka wareegga lacagaha iyo in ay la wareegto kaydadka dammaanadda, ee la xiriira.

Dhinaceeda, dawladda Talyaanigu waxay awaamir siineysaa Sanduuqa Wareegga lacagaha ee Soomaaliya, xagga xil-wareejinta lagama maarmaanka ah.

3. Xagga wixii la xiriira hawlaha Sanduuqa oo Soomaaliya gudaheeda ka ah machad soo-saarid lacag, marka la gaaro taariikhda horey loo soo sheegay, Sanduuda Wareegga Lacagta, ee Soomaaliya, waxa uu u diyaargaroobi doonaa in uu Hayadda soomaaliyeed, ee ku xusan faqradda 2, ku wareejiyo waxyaabaha soo socda oo lagu leeyahay Waaxdiisa bangiga:

1. deyn aragti ku-bixina;
2. dhigaal xisaab socota;
3. dhigaal keydsi;
4. xisaab socota ee xiran;
5. balanqaadyo lacag qalaad iyo rahan lacageeda..

Xagga wajihidda nusqaantaas, Sanduuqa Wareegga Lacagta, ee Soomaaliya, waxa uu Hayaddaas kor lagu soo sheegay ku wareejin doonaa hantida iyo xuquuqda ay leedaha Waaxdiisa bangiga in u dhiganta.

Isla waqtiga wareejinta hantida iyo deymaha lagu xusay faqradi hore, waxaa lala wareejin doonaa xaddiga , xagga xisaabinta hantida iyo deymaha la xiriira amarada bixinta ee kala deyn-bixidda, lacagta laga shubayo shirkada dhismaaya, kambiyaalayaasha ku jira bortafolyada (gudaha iyo dibedda) oo lo ohayo cid saddexaad xagga soo xareynta, iyo weliba xaddiga xoolaha loo haayo xisaabtanka ka dhacaya Soomaaliya.

4. Si Hayadda soomaaliyeed, ee kor ku xusan, loogu suurtageliyo in ay danaheeda qabsato, Sanduuqa Lacagta, ee Soomaaliya, waxaa waxa uu diraarinaya, ayada isticmaal ku meel gaara loo siinayo Hayadda nafteeda, hantida ay ku yeelay (ku haysatay) dhulka Soomaaliyeed. oo leh wixii qalab la xiriira. Kaydka lacagta shilin soomaaliga xaashida iyo googóa macdanta – iyo sida xataa qalabka soo-saaridda (sameynta) lacata ah macdanta iyo xaashida naftooda, iyo weliba jeegagga . laakiin waxaa loo wareejinayaa sí abad ah.

5. Arrin kasta oo kale oo la xiriirta Wareegga lacagta iyo wixii dambe, oo ah wareejin siyaadada iyo nusqaanta Sanduuqa, waxaa lagu dhammeynayaa mucaahado dhexmarta labada Xukuumadood.

Mudane, fadlan noo xaqiiji in Xukuumaddaada ay waafaqsan tahay arrimaha hore, annaga oo sugeyna in qoraalkan wargelinta iyo jaabta aad, Mudane, Noo soo gudbin doonto ay isku noqon doonaan mucaahado u dheysa labadeena Xukuumadood.

Waxaa farxad ii ah fursadda aan, Mudane, kuugu cusbooneysiinayo qaddarinteyda ugu sarreysa.>>

Aniga oo ka jawaabaya, waxaa sharaf ii ah, Mudane, in aan kugu wargeliyo in Xukuumaddeydu ay sí buuxda u waafaqsan tahay arrimaha lagu caddeeyey Qoraalkaas wargelineed, waxayna oggoshahay arrimaha lagu soo dhex geediyey.

Waxaa I farxadgelinaya fursadda aan, Mudane,kuugu cusbooneysiinayo qaddarinteyda ug sarreeysa.

Madaxa Wefdiga soomaaliyeed
Mudane, Xil. **Dr. Maxamed Sheekh Gabyo**

Ku Mudane Xil. **Carlo Russo**
Madaxa Wefdiga talyaaniga

## MUCAAHADO U DHEXEYSA ITAALIYA IYO SOOMAALIYA EE XAGGA NIDAAMKA GUUD EE DANAHA MOOSLEYDA (LA XIRIIRA MOOSKA)

XUKUUMADDA TALYAANIGA iyo XUKUUMADDA SOOMAALIYEED, sí loo nidaamiyo, loona hormariyo xiriirrada ka dhexeeya labada dal,ee xagga majaalka tacabka iyo ka-ganacsiga mooska, waxa ay ku heshiiyeen qodobbada soo socda:

### Qod. 1

Xukuumadda talyaaniga, sí loo abuuro duruufo (jawi) saacidaaya wanaajinta, horumarka iyo suuq-geynta tacabka (soo-saaridda) mooska soomaaliyeed, waxa ay u tooghayneysa, sí la socon karta waajibaadka uga imanaya ballamada caalamiga oo ay horey u gashay, gadashada, ayada oo u mareysa Shirkadda Ixtikaarka (Ku-kaliyeeysiga) Ganacsiga Mooska – si waafaqsan waajibaadka hayadeed, ee Shirkadda nafteeda , in qaddaran oo ka mida mooska ah tacab soomaaliyeed, oo sanad sanad ugu wada heshiin doonaan labada Xukuumadood.

Xukuumadda Talyaanigu waa sii wadi doontaa inay moos ka keensato xataa suuqyo kale; gadashada mooska, meel kasta ha laga keenee, waxa ay ku xiran tahay qaadka suuqa talyaaniga, tayada iyo fayaqabka mooska.

### Qod. 2

Xukuumadda Soomaaliyeed, si ay u dejiso gundhigga lagama maarmaanka u ah Xukuumadda Talyaanigu si ay dhab ahaan ugu dhaqaaqdo fulinta arrimaha lagu heshiiyay, ee ku xusan qodobka 1, waxay qaadan doontaa tallaabo kasta oo qiimaha mooska soomaaliyeed lagu waafajinayo iyo kan suuqa caalamiga ah, iyo in ay sidoo kale xaqiijisonaagga tayadiisa. Si taas loo gaaro, Xukuumadda Soomaaliyeed waxay ku dadaaleysaa in ay yareeyso kharashka soo-saaridda mooska, iyadoo qaasatan ku fikireysa in ay sameyso cashuur dhimista, iyadoo si gaar ah u yeelaneysa canshuuraha dekedda.

### Qod. 3

Sí loo meelmario jeeddada ahayd in Talyaanigu laga iibiyo qaddar moos ah, ayada oo lagu saleynayo isweydaarsiga qoraallada wargelin ee ku lifaaqan Mucaahadadan, beeraleyda ah soo-saarayaasha iyo kuwa ah dhoofiyayaasha mooska, ee Soomaaliya, waxaa matalaaya, xagga xiriirka ay la leeyihiin Shirkadda Monoboolyada Mooska, Xiriirka beeraleyda mooska tacba (moos-tacbayaasha), ee Soomaaliya, oo ku bahoobay magaca “FEBAS”.

Sí waafaqsan xaaladaha ay dhexdooda kaga wada-xaajoodeen Aseendada kor ku xusan iyo labada shirkadood oo ay ku mideysan yihiin Beeraleyda (Aseendooyinka) ka kala hawlgala degmada Shabeelaha iyo degmada Jubbada.

**Qod. 4**

Nidaamka saad-siinta oo ay dhigeyso Mucaahadadan waxa uu ku imaanayaa sí ku saleysan xeerarka lacag-bixinta, ee ka dhex jira Itaaliya iyo Soomaaliya goorta ay dhacayaa hawlgallada la xiriira fulinta isla Mucaahadadan.

**Qod. 5**

Waxaa la dhisay Guddi isku-dhafa loona sinman yahay, oo xaruntiisa tahay magaalada Muqdisho, kana kooban wakiillo ka socda Xukuumadda talyaaniga (iyadoo uu wehliyo khabiir ka socda Shirkadda Kali-haysata Ganacsiga (Manaboolyada) Mooska iyo wakiillo ka socda Xukuumadda Soomaaliya (oo uu weheliyo wakiil ka socda FEBAS), oo ikhtisaas u leh xagga wixii la xiriira fulinta Mucaahadadan. Wakiilada Xukuumadda talyaaniga iyo Xukuumadda Soomaalida waxaa ay kaashan karaan khubaro kale.

Gaar ahaan, Guddiga Isku-dhafka ah hawshiisu waxa ay noqon doontaa in uu xaqiijiyo in soo-saarista, baakadeynta, daabulaadda iyo raridda mooska loo dhoofinayo Talyaaniga loo fuliyo, sí waafaqsan ballan-qaadyadii la sameeyey iyo in bixinta ruqsadaha dhoofinta, ee la siinayo shirkadaha daneynaya, ay ku dhacdo waqti habboon.

Qodobka 6. - Mucaahadadan waxa ay dhaqangeleysaa Janaayo 1, 1961 waxayna ansax ahaaneysaa ilaa 31$^{da}$ Disembar, 1965.

Ilaa 31ka Disembar 1960 mooska soomaaliya ee laga iibinayo Itaaliya waxaa nidaamin doona heshiisyada u dhexeeya Aseendada Maanabooliyada Mooska iyo Shirkadaha soo-saaridda iyo dhoofinta mooska.

Haddii Mucaahadadan aan laga sheegan (laga bixin), ugu yaraan sanad ka hor muddada dhammaadkeeda (dhicitaankeeda), ayadaas waxaa loo qaadanayaa in juug laáan loo cusbooneysiiyey sanadba sanad, haddii laga reebo marka laga sheegto, ayada oo laga bixiyey ogeysiis lix bilooda.

Dadka hoos ku qoran, oo ah wakiillo awood buuxda haysta, waxa ay saxiixeen Mucaahadadan, waxayna saareen shabbadahooda.

Waxaa lagu sameeyey Rooma, 23$^{ka}$ Noofembar 1960, ayada ka kooban laba nuqul.

| | |
|---|---|
| Xukuumadda soomaaliyeed | Xukuumadda talyaaniga |
| waxaa u saxiixay | waxaa u saxiixay |
| **Sheekh Cali Jumcaale** | **Segni** |

Rooma, 23$^{ka}$ Nofembar 190

**MUDANE,**

Xagga wixii la xiriira Mucaahadada ka dhexeysa labadeenna Dal, ee ku saabsan nidaamka, guud, ee danaha moosleyda, oo la saxiixay taariikhda manta, aniga oo ku hadlaaya magaca Xukuumadda talyaaniga, waxaa sharaf ii ah inaan soo bandhgo arrimaha soo socda:

Ayada oo la dabbaqayo qodobka 1, lana caacinayo afeefta halkaas lagu tilmaamay (muujiyey), caddadka ugu badan, ee mooska soomaaliyeed, ee sanadka 1961, waa la kordhinayaa, waxaana la gaarsiinayaa ilaa 120.000 kiintaal, waxaa la goáamiyey, sidaas darteed, isku-dar ahaan 770,000 oo kiintaal. Kordhintaas waxaa waxaa la dabbaqi doonaa laga bilaabo saddex-

biloodlaha afaraad, ee sanadka 1960, isku celcels bishiiba 16.000 kiintaal. marka loo eego caddadkii 1960 Itaaliyadeegsiga farshaxanka.

Korrosiimoon dhin kale, ee caddadka oo loo gooyo sanadka 1960 waxaa ku wada heshiin kari doonaa labada Xukuumadood, ayada oo laga bixinayo ogeysiis, ugu yaraanlix bilooda, lana dhowrayo waajibaadka iyo xaaladaha ku xusan qodobbada 1 iyo 2.

Xukuumadda soomaaliyeed waxa ay diyaarineysa qoondha, aseendooyinka ah soo/saarayaasha mooska, ee Soomaaliya gudaheeda, iyo kuwa dhoofiyayaasha ah dhexdooda, koror kasta oo sanadle ah, marka loo eego caddadka loo gooyey sanadka 1960, lagana bilaabo kororka 120.000$^{ka}$ kt ah (boqol iyo labaatabka kun oo kiintaal) oo kor kagu soo tilmaamay.

Haddii ay dhacdo in ay nusqaan ku timaado caddadka mooska soomaaliyeed, ee sanadkii loo dhoofiyo Itaaliya, taas oo ay sabab u tahay awoodda qaadashada guud (qaadka), ee suuqa talyaaniga, oo hoos-u-dhacday (yaraatay), saamiga loo qoondeeyey shirkad kasta oo ah soo-saarto iyo tan dhoofisada oo ay ku leedahay caddadka horey loo soo sheegay waxaa laga dhimaa qaddar u dhigma.

Tacbayaasha mooska oo hadda jira waxa ay sanadkii xaq u leeyihiin qin qoonde ahaan loo siiyo caddad moos ah oo ay u dhoofiyaan Itaaliya oo aan ka yareyn kii mid kasta gooni loou qoondeeyey sanadkii 1960, bi-shardi in caddadkaas uu yahay mid ay dhab ahaan ayagu ka soo kala saareen ajeendooyinkooda, haddii laga reebo dhimista saamiga kor ku xusan.

Haddii, MUDANE, aad waafaqsan tahay wax horey loo soo sheegay, Qoraalkaan wargelinta iyo jawaabta aad, MUDANE, ii soo celin dootid waxa ay isku nayaan mucaahado ka dhexeysa labadeenna Dal, ee xagga nidaamka guud ee danaha moosley (xagga mooska).

Jawaab-celin, waxaa sharaf ii ah in aan ku ogeysiiyo, MUDANE, in Xukuumaddeydu ay sí buuxda u waafaqsan tahay arrimaha lagu soo bandhigay Qoraalkaas wargelinta.

Waxaa farxad gelineysa fursadda aan, MUDANE, kuugu cusbooneeynayo qaddarinteyda ugu sarreysa.

**SEGNI**

Ku: MUDANE Xil. **Sheekh Cali Jumcaale**
Wasiirka Caafimaadka iyo Shaqada ee
Jamhuuriyadda Soomaaliyeed
Rooma

Rooma, 23$^{ka}$ Nofembar 1960

**MUDANE,**

waxaa sharaf ii ah in aan ku la socodsiiyo helitaanka Qoraalkaadii wargelinta, MUDANE, ee taariikhda manta, una qornaa sida soo socota:

<<Ayada oo la dabbaqayo qodobka 1, oo ay wehliso afeefta halkaas lagu tilmaamay (muujiyey), caddadka ugu badan, ee mooska soomaaliyeed, ee loo dhoofinayo Itaaliya, sanadka 1961, waa la kordhinayaa, waxaana la gaarsiinayaa ilaa 120.000 kiintaal, marka loo eego caddadka sanadka 1960, waxaa sidaas darteed la goáamiyey isku-dar ahaan 770,000 oo kiintaal. Kordhintaas waxaa la dhaqangeli doonaa laga bilaabo saddex-biloodlaha afaraad, ee sanadka 1960, isku celcels bishiiba 16.000 kiintaal.

marka loo eego caddadkii 1960 Itaaliyadeegsiga farshaxanka.

Korrosiimoon dhin kale, ee caddadka oo loo gooyo sanadka 1960 waxaa ku wada heshiin kari doonaa labada Xukuumadood, ayada oo laga bixinayo ogeysiis, ugu yaraanlix bilooda, lana dhowrayo waajibaadka iyo xaaladaha ku xusan qodobbada 1 iyo 2.

Xukuumadda soomaaliyeed waxa ay diyaarineysa qoondha, aseendooyinka ah soo/saarayaasha mooska, ee Soomaaliya gudaheeda, iyo kuwa dhoofiyayaasha ah dhexdooda, koror kasta oo sanadle ah, marka loo eego caddadka loo gooyey sanadka 1960, lagana bilaabo kororka 120.000$^{ka}$ kt ah (boqol iyo labaatabka kun oo kiintaal) oo kor kagu soo tilmaamay.
Haddii ay dhacdo in ay nusqaan ku timaado caddadka mooska soomaaliyeed, ee sanadkii loo dhoofiyo Itaaliya, taas oo ay sabab u tahay awoodda qaadashada guud (qaadka), ee suuqa talyaaniga, oo hoos-u-dhacday (yaraatay), saamiga loo qoondeeyey shirkad kasta oo ah soo-saarto iyo tan dhoofisada oo ay ku leedahay caddadka horey loo soo sheegay waxaa laga dhimaa qaddar u dhigma.
Tacbayaasha mooska oo hadda jira waxa ay sanadkii xaq u leeyihiin qin qoonde ahaan loo siiyo caddad moos ah oo ay u dhoofiyaan Itaaliya oo aan ka yareyn kii mid kasta gooni loou qoondeeyey sanadkii 1960, bi-shardi in caddadkaas uu yahay mid ay dhab ahaan ayagu ka soo kala saareen ajeendooyinkooda, haddii laga reebo dhimista saamiga kor ku xusan.
Haddii, MUDANE, aad waafaqsan tahay wax horey loo soo sheegay, Qoraalkaan wargelinta iyo jawaabta aad, MUDANE, ii soo celin dootid waxa ay isku nayaan mucaahado ka dhexeysa labadeenna Dal, ee xagga nidaamka guud ee danaha moosley (xagga mooska)>>.
Jawaab ahaan, waxaa sharaf ii ah, MUDANE, in aan kugu wargeliyo in Xukuumaddeydu ay sí buuxda u waafaqsan tahay arrimaha lagu soo bandhiga (jeediyey) Qoraalkaas wargelinta ee la sheegay,
Waxaa farxad-gelineysa fursadda aan, MUDANE, kuugu cusbooneeynayo qaddarinteyda ugu sarreysa.

**Sheekh Cali Jumcaale**

Ku: MUDANE Xil. **Antonio Segni**
Wasiirka Arrimaha Dibedda ee
Jamhuuriyadda Talyaaniga
Rooma

## MUCAAHADO ISKAASHI DHAQAALE IYO FARSAMO EE KA DHEXEYSA ITAALTIYA IYO SOOMAALIYA

XUKUUMADDA TALYAANIGA iyo XUKUUMADDA SOOMAALIYEED, ayaga oo hiigsanaya mabaadída wada-shaqaynta dhow oo saldhigga u ah xiriirrada ka dhexeeya laba dal, ayada oo la tixgeliyey codsiga ay soo qaddintay Xukuumadda soomaaliyeed oo ah in ay adeegsan karto khubaro farsama-yaqaanno talyaani ah, sí ay u xoojiso, una hormariso nidaamka maamul, dhaqaale, bulsho iyo farsamo, ee dalka,

waxa ku heshiiyeen qodobbada soo socda:

### Qod. 1

Xukuumadda Talyaanigu waxay ku dadaaleysaa inay ugu deeqdo Xukuumaadda Soomaaliya, markii ay codsato, khubaro iyo farsamo-yaqaanno, ayada oo qaadeysa culeyska lacageed ee mashaharooyinkooda, ayada oo aan laga bixin xuduuda kharash oo uu dhigay sharciga talyaaniga, ee fulinta Mucaahadadan.

Khuburada iyo farsamo-yaqaannada waxaa laga dhex dooran karaa shaqaalaha Dawladda iyo Hayadaga Guud, ee talyaaniga, ama xirfadlayaan iyo/ama farsamo-yaqaanno gaara oo haysta jinsiyadda talyaaniga.

**Qod. 2**

Codsiyada ku saabsan khubaro iyo farsamoyaqaanno talyaani ah waa in ka yimaadaan Xukuumadda Soomaaliyeed kuna jahaysan yihiin Xukuumadda Talyaaniga iyada oo loo marayo Safaaradda talyaaniga, ee Muqdisho. Codsiga waa in lagu muujiyaa: derejada khabiirka ama farsamoyaqaanka, howlaha loo xilsaarayo, meesha uu degi doono iyo muddada loo malaynayo inuu ka shaqeynayo Soomaaliya.

Xukuumadda Soomaaliya waxay awood u yeelaneysaa inay magac ahaan u muujiso doorbididdeed khuburo iyo farsamo-yaqaanno ay isleedahay sí gaar ah ayey ugu habboon yihiin (ugu qalmaan) hawlaha loogu talagay.

Wakhtiga ugu yar ee suurtagalka, gudahiisa, wakiilka diblomaasiyadeed ee Talyaanigu ku leeyahay Muqdisho waxa uu Xukuumadda Soomaaliyeed gaarsiinayaa magacyada dadka la soo jeediyey, asaga oo mid kasta u cayimayo shaqada ay u qaban doonaan Xukuumadda soomaaliyeed. Xukuumadda Soomaaliyeed waxa ay, dhankeed, sida ugu dhaqsiyaha badan, Xukuumadda talyaaniga ku gaarsiineysaa oggolaanshaheeda iyo, inta ka khuseysa, xaqiijinta duruufadaha shaqada.

**Qod. 3**

Khubaro iyo farsamoyaqaanno Talyaaniga ah waa in loo deegsado howlaha loo codsaday. Wax-ka-beddel kasta oo lagu sameynayo shaqada (xilka) waxaa lagu go'aamin karaa heshiis dhexmara Xukuumadda Soomaaliyeed iyo wakiilka diblomaasiyadeed ee Talyaaniga u fadhiya Muqdisho.

Haddii baahideedu soo baxdo, Xukuumadda Soomaaliyeed, ka dib marka ay la tashato Xukuumadda Talyaaniga, waxay amri kartaa in khabiir ama farsamo-yaqaan Talyaani ah laga beddelo xarun oo loo beddelo mid kale, haddii taasi aysan ka hor imaaneynin maqaamkooda sharci iyo xaaladaha gaarka ah ee heshiiskooda shaqo.

Sí loogu saamaxo khuburada iyo farsamo-yaqaannada in ay hawlaha lagu aaminay fuliyaan, ayaga oo adeegsanaya sumcadda iyo awoodda lagama maarmaanka ah, Xukuumadda soomaaliyeed waxa ay ka taxaddireysa in ayagaas loo xaqiijiyo, xagga xiriirka la ay yeelanayaan Madaxda maxalliga iyo xiriirrada bulsho, mucaamalo u qalanta derejadooda iyo xilalka ay gudanayaan.

Xukuumadda Talyaanigu, iyada oo aan laga hor imaanin waxa lagu jideeyey faqradda saddexaad, ee qodobka 5, ee Mucaahadanan, waxa ay dhiganeysaa afeefta, ka dib marka ay la tashato Xukuumadda soomaaliyeed, in ay khiyaar u leedahay in ay dib ugu yeerato khuburada iyo farsamo/yaqaannada ay ayadu u aragto in ay habboon tahay in ay dib ugu yeerato, ha ahaato xag baahi adeegga, ama sababta ha ahaato in ay hawlahii loogu talagalay u gudan waayeey sidii la rabay.

Xukuumadda talyaanga ka baaqsan meyso, dhanka kale, in ay wax ka qabato wixii dalabyo ah ee kaga yimaada Xukuumadda soomaaliyeed, ee ku saabsan in ay beddesho khabiir ama farsamo/yaqaan talyaani ah, ka hor inta aysan dhammaan muddadii xilka, haddii ay gudboonaato fursadda.

**Qod. 4**

Xukuumadda talyaaniga waxa ay toos u bixineysaa mushaharooyinka khuburada iyo farsamo-yaqaannada, oo ay ku jiraan gunnooyinka goán iyo kuwa joogtada iyo dib-u-celinta kharashyada la xiriira beddela ( oo ay ku jiraan kuwa ku baxaya xubnaha qoyska la nool, gunnooyinka la xiriirta xagga naafada, geerida iyo shaqo ka-saaridda (ruqsada).

Xukuumadda soomaaliyeed, haddii hawlaha iyo duruufaha maxalliga ay kallifayaan, ku dhaqaaqeysaa in ay khubarada iyo farsamo-yaqaannada u diyaariso gaadiid ay raacaan iyo, haddii taas ayasa suurtogal ahayn, in ayaga siiso gunno ku filan (ku aadda).

Waxaa Xukuumadda soomaaliyeed saran gunnooyinka aan caadiga ahayn, kuwa habeen-dhaxa (hawlgalka), ku shaqada dheeraadka iyo ijaar kasta oo ay jideynayaan axkaamta sharci, ee ka jirta Soomaaliya.

khuburada iyo farsamo-yaqaannada ajnabiga oo la derejada iyo xilka ah, oo ay Xukuumadda Gunnooyinka aan caadiga ahayn waxa ay ku cabbiran yihiin derejooyinka iyo xilalka loo dhiibayo khuburada iyo farsamo-yaqaannada, sí kastana uguma yaraan karaan kuwa la siiyo soomaaliyeed ugu deeqeen Ururro Caalami ah ama Dawlado saddexaad.

Ugu dambeyntii, khuburada iyo farsamo-yaqaannada, kor ku xusan, waxaa loo aqoonsaday dhammaan xuquuqda ay leeyihiin, ee ku saleysan xiriirka shaqo oo ka dhexeeya ayaga iyo Madaxda talyaaniga iyo gaar ahaan xaqa fasax, ha ahaado mid caadi ah iyo mid aan caadi ahayn intaba.

**Qod. 5**

Khuburada iyo farsamo-yaqaano Talyaani ah, xagga wixii khuseeya fulinta hawlahooda, waxay uga jawaabayaan oo ku la xisaabtamaya Madaxda soomaaliyeed, ee awoodda u leh.

Ayagaas waxay ka fogaanayaan wax kasta oo dhaqdhaqaaq siyaasadeed ah ama xaalad kasta oo aan la socon karin shaqadooda. Ayagu waxay sidoo kale ka fogaanayaan howlaha kale, oo ay mushaar ku qaadanayaan , haddii aysan si cad ugu oggolaan dowladda Soomaaliya.

Xagga saameynta agaasin, maamul iyo anshax-marin, ayaga waxa ay si gooni ah u hoos tagaan Madaxda dibloomaasideed iyo qunsuliyadeed (Safaaradda iyo qunsuliyadda, ee u joogta Soomaaliya.

**Qod. 6**

Xukuumadda soomaaliyeed waxa ay khuburada iyo farsama:

1. yaqaannada talyaaniga u aqoonsaneysaa;
2. ka dhaafista cashuuraha dakhliga ee laxiriira lacagta ay ayaga siiso Xukuumada Talyaanigu;
3. ka-dhaafidda in lagu dabbaqo, ayaga iyo qoysaskooda, axkaamta sharci, ee la laxiriirta soo gelitaanka ajaanibta (shisheeyaha) soo galaysa Soomaaliya iyo habka diiwaangelinta ee loo dejiyey ajaanibta (shisheeyaha);
4. ku raaxaysiga, ayagaoo ay weheliyaan xubnaha qoyskooda, tas-hiilaad dib-ugu-celinta oo la la siiyo, oo ku saleysan xeerarka iyo habdhaqanka caalamiga;
5. Xaq u leeyahay in si xor ah u la soo dejiyo agabkooda guriga (alaabtoodaguriga), gawaaridooda iyo wixii ayaga shaqsi ahaan u taabanaya, waqtiga imaatinkood Soomaaliya, iyo ka dhaafitaan la mid ah waqtiga bixitaankooda abadka ah;

6. ikhtiyaarka khiyaarka) ah in ay si xor ah dalkooda ugu wareejistaan wixii ay ka keydsadeen lacagaha ay qaataan, inta ay ku sugnaayeen Soomaaliya gudaheeda, kuwa caadiga iyo kuwa aan caadiga ahayn, oo ay ku qaateen lacagta Soomaaliya;
7. Si kastaba, khuburada iyo farsamayaqaannada Talyaaniga lama siin karo, aag kasta, mucaamalo ka hooseysa tan ay haystaan saraakiisha soomaalida ama khuburada ka socota dal saddexaad oo isku derejo iyo isku shaqo yihiin.

**Qod. 7**

Maadaama waxqabadka khubaro iyo farsamoyaqaan Talyaani ah lagu fuliyay danta Soomaaliya, Xukuumadda Soomaaliya waxay ka jawaabeysaa oo mas'uul ka noqoneysaa waxyeelada iyo khasaaraha kale ee ka dhasha ficil ama ka baaqsi oo loo tiirin karo khuburada iyo farsam-yaqaannada talyaaniga ag, inta ay ku gudajiraan fulinta xilalkooda, marka laga reebo xaaladaha uu jiro ula-kac.

**Qod. 8**

Haddii uu dhinacyada dhexdooda ka aloosmo khilaaf ku saabsan xagga fasiraada iyo dabbaqaadda Mucaahadadan, dhinacyada naftooda waa ay uga wada tashanayaan, sí ay ku jirto niyad saaxiibtinimo, ujeedkooduna yahay in ay helaan xal ku habboon,ayaga oo adeegsanaya, haddii loo baahdo, Guddi Dhexdhexaadin oo ka kooban laba xubnood oo midkoodba mid ka wakiil yahay.

Haddii Guddigu is-af-garad gaari waayo waxa uu magacaabayaa qof saddexaad, oo fulinaya xilka dhexdhexxaadiye kali ah oo soo saaraya goáan kama dambeys ah oo labada dhinacba qabbiraya (khasab ku ah labada Xukuumadood.

**Qod. 9**

Mucaahadadan waxa ay dhaqageleysaa laga bilaabo $1^{da}$, waxa ansax ahaanayaa ilaa $30^{ka}$ Juun 1962.

lix bilood ka hor inta aysan dhicin muddada, labada Xukuumadood waxa ay ka xaajoon karaa Mucaahado cusub oo dhaqangeli doonta dhammaadka muddada ansaxnimada mucaahadadan hadda jirta.

Wakiillada awoodda buuxda haysta, oo kala matala dhinacyada, waxa ay saxiixeen Mucaahadadan, waxayna saareen shaabbadahooda.

Waxaa lagu sameeyey Rooma, $26^{kii}$ Abriil 1961, ayada oo ka kooban laba nuqul.

Xukuumadda Soomaaliyeed
**Cabdulle Maxamuud Maxamed**

Xukuumadda Talyaaniga
**Carlo Russo**

**MUCAAHADO DHAQAMEED EE KA DHEXEYSA ITAALIYA IYO SOOMAALIYA**

XUKUUMADDA TALYAANIGA iyo XUKUUMADDA SOOMAALIYEED, ayaga oo ku qanacsan in wada-shaqayn weyn oo dhexmarta labada shacbi xagga majaalka (aagga) dhaqanka ay sí gaara wax uga tareyso in la xoojiyo xiriirradooda saaxiibtinimo iyo in laga gungaaro, lana ballaariyo aqoonta ay isku leeyihiin, waxa ay goáansadeen in ay guntaan (wada galaan)

Mucaahado dhaqameed, oo hiigsaneysa mabaadída xiriir iskaashi oo dhow, sidaas darteedna waxa ay ku heshiiyeen qodobbada (arrimaha) soo socda:

**Qod. 1**

Mid kasta oo ka mid ah dhinacyada mucaadada waxa awoodayaa in uu dhulka kan kale ka sameeyo dugsiyo iyo macaahid heer iyo derejo kasta iyo weliba xubno dhaqameed, sí waafaqsan xeerarka ka jira labada Dal.

Hay'adaha la soo sheegay waxaa laga dhaafayaa canshuuraha tooska ah ee saran maguurtooyinka ay milkida u leeyihiin iyo dakhliga ayagaas la xiriira, xagga qaybaha maguurtooyinkaas oo loo isticmaalo ujeeddooyin dhaqameed, waxaa kale oo laga dhaafayaa canshuuraha xagga wareejinta xuquuqda milkiyeed, ee dhulka iyo dhismooyinka loogu talagalay in xarumo looga dhigo.

Qalabka waxbaridda iyo habka waxbaridda ee loogu talagalay iyaga iyo iyo qalabka iyo agabka lagu bilo lama saarayo xuquuq iyo nannibaad toona.

**Qod. 2**

Marka uu codsado mid kasta oo ka mid ah dhinacyada mucaahadada, axkaamta qodobka 1, dhulka dhinaca kale gudahiisa, waxaa lagu dabbaqayaa dugsiyada iyo mac-hadyada oo dabeecaddooda iyo habkooda waxbarid la jaanqaadaya kuwa ururrada waxbarsho iyo dugsiyada dawladeed, ee dhinaca codsaday.

**Qod. 3**

Dhinacyada Mucaahadada waxay balla-qaadayaan inay baarayaan, ayada oo aan lagu gudbin xuduudda ay dejinayaan sharciyada labada Dal, suurtagalnimada in la aqoonsado, xag ujeeddooyin waxbarasho iyo xag u-adeegsiga xirfadeed, shahaadooyinka waxbarashada dhexe iyo dhammaadka oo ay bixiaan dugsiyada ku xusan qodobbada 1 iyo 2.

Sidaas sí la eg, dhinac kasta oo ka mida dhinacyada Mucaahadada waxa uu darsayaan suurtagalnimada in aqoonsi la mida la siiyo shahaadooyinka waxbarashada dhexe, iyo kuwa dhammaadka oo ay bixiyaan dugsiyada heer iyo derejo kasta, ee dhinaca kale.

**Qod. 4**

Dhinacya mucaahada waxa ay ballan-qaadayaan in ay dhiiri-geliyaan oo ay fududeeyaan, inta ugu suurtogalnimo badan, iskaashiga dhaqameed, cilmiyeed, farsamo iyo isboorti eeka dhexeeya labada Dal, iyada oo lagu dhaqaaqayo:

A) dirista macallimiin, muxaadao-jeediyeyaal, aqoonyahanno iyo farsamo-yaqaanno;
B) Siismo kab xag waxbarasho;
C) isdhaafsi qoraallo dhaqameed, cilmiyeed iyo faneed, oo ay soo saaraan xubnaha iyo hayad xukuumadeed iyo mac-hayo madaxbannaan;
D) bandhigyo faneed, riwaayadeed, muusikeed, usbuuca buugga iyo flimmada, iyo weliba wixii qorshe ah, oo uu Guddiga Isku-dhafan, eek u xusan qodobka 7, u arko in uu waxtar u leeyahay wada-shaqaynta dhaqameed, ee u dhexeysa labada dhinac;
E) heshiisyo gaar ah oo wixii ku saabsan wada-shaqayntooda xagga majaalka (aagga) idaacada, telefishanka, sameynta filimada iyo dalxiiska;
F) qabashada shirar, iyo tartamo u dhexeeya ciyaartoyda iyo dadaal kasta oo kale oo loogu talagalay in lagu xoojiyo xiriirka ka dhexeeya labada dal ee dhinacyada jimicsiga iyo isboortiga.

**Qod. 5**

Dhinac kasta oo ka mida dhinacyada mucaahadada waxa uu fududeynafaafinnta (baahinta) buugaagta, wargeys-xilliyeedyada, diskiyada iyo cajaladaha magnetika oo lagu soo saaray dalka kan kale.

**Qod. 6**

Xukuumadda talyaanigu waxay damacsantahay inay bixiso abaalmarinno,kaalmo kab ah iyo deeqo waxbarasho oo la siinaayo muwaadiniinta soomaaliyeed ee doonaya inay gaaraan (tagaan) Itaaliya sì ay uga qeyb galaan tababarro (koorisyo) ka socda xarumo waxbarasho, fuliyaan cilm- baaris ama ay dhammeystirtaan aqoontooda afeed, suugaaneed, cilmiyeed iyo qaab farsameed.
Qoondaynta iyo maamulka deeqaha waxbarasho waxay hoos-imaanayaan (lagu dhaqayaa) xeerarka ku lifaaqan Mucaahadadan.

**Qod. 7**

Xagga meelmarinta (fulinta) Mucaahadadan waxaa la dhisayaa Guddi isku-dhaf ah oo ka kooban wakiilo ka kala socda labada Xukuumadood, kuwaas oo kaashan kara khuburo.
Guddigaas waxaa kale, ee uu u xilsaaran yahay in uu lahaado kormeeridda habsami u-shaqaynta Mucaahadadan, fududeynta fulinteeda iyo inuu darso oo dhiirrigeliyo dhammaan qorshooyinka oo u muuqan kara kuwo wax ku kordhinaya wada-shaqayn wax-ku-ool ah, ee dhexmarta labada Dal.

Guddiga Isku-dhafan waxa uu, goorta uu arko lagama maarmaan, sí tatantaalli ah ugu kulmayaa magaalooyinka Rooma iyo Muqdisho.
Gudiga isku dhafka ah wuxuu isaguna markiisa abuurayaa xoghaynta joogtada ah ee fadhigeedu yahay magaalada Muqdisho taas oo hubineysa kala gó laáanta hawsha Guddiga.

**Qod. 8**

Mucaahadadan waxaa la galay (la kala saxixday) ayada oo lahayn waxqti xaddadan oo ay ku egtahay; hase yeeshe, labada dhinac midkood waa ka sheegan karaa (ka bixi karaa), asaga oo ka bixinaya ogeysiis lix bilooda.

Wakiillada awoodda buuxda haysta, oo kala matala dhinacyada, waxa ay saxiixeen Mucaahadadan, waxayna saareen shaabbadahooda.

Waxaa lagu sameeyey Rooma, 26[kii] abriil 1961.

Xagga Xukuumadda soomaaliyeed
**Cabdulle Maxamuud Maxamed**

Xagga Xukuumadda talyaaniga
**Carlo Russo**

## NIDAAMKA QOOYNDEYNTA IYO MAAMULKA DEEQAHA WAXBARASHO EE TALYAANIGA EE LOOGU DEEQAAYO AQOONYAHANNO SOOMAALIYEED

1. Si loo dhaqan galiyo qodobada 6-aad. ee Mucaahada Dhaqanka ee u dhaxeeysa Itaaliya iyo Soomaaliya oo lagu kala saxiixday Rome bishii Abriil 26, 1961, waxaa la dhisayaa Guddi isku-dhafa oo xaruntiisu tahay Muqdisho.
2. Guddigu wuxuu ka kooban yahay hawlwadeen oo ay magacaawday Wasaaradda Waxbarashada Soomaaliya iyo mid u magacaabay Safiirka Talyaaniga ee Muqdisho, kuwaas oo kaashan kara khuburo;
3. Guddigu waxa uu sannad walba dejinayaa barnaamijka, tirada iyo qaddarka deeqaha waxbarasho oo ay Xukuumadda talyaaniguballan-qaadeyso in ay ugu deeqeyso muwaadiniinta soomaaliyeed ee doonaya inay gaaraan (tagaan) Itaaliya si ay uga qaybgalaan tababarro (koorsooyin) oo lagu qabanayo (dhigayo) mac-hadyo ay talyaani waxbayaa. Deeqaha waxbarasho muddadooda waa ugu badnaan hal sano dugsuyeed (1 Nofembar – 31 Oktoobar), laakiin waa la cusbooneysiin karaa;
4. Guddigu waxayna u xilsaari doonaan deeqaha waxbarasho ee la diyaariyey, iyadoo la tixraacayo gaar ahaan baahida loo qabo in la xoojiyo diyaarinta ardayda qalin-jabisa iyo khabiirada ku takhasustay meelaha ay Soomaaliya hadda ka jirto baahida ugu weyn uguna degdegga badan shaqaalaha. takhasus leh;
5. Deeqda waxbarasho ee laga hadlaayo ayaa inta badan loo qoondeeyay ardayda (da'doodu u dhaxayso 18 iyo 30) kuwaas oo ku hamiyaya inay dhammaystiraan dhammaan wareegyada waxbarasho ilaa ay ka gaarayaan heerka shahaadada ama dibloomaaadda ay soo saareen jaamacadaha, akadeemiyooyinka militariga machadyada lala mid/dhigay.

Si kastaba ha noqotee, waxaa kaalmooyin kab ah oo leh muddo ka duwan loogu deeqi karaa (la siin karaa) arday horey u qalin-jabisay (da'doodu u dhaxayso 22 ilaa 35) kuwaas oo doonaya inay daraasado takhasus ah ka sameeyaan machadyo tacliinta sare iyo kuwo loogu talagalay farsamoyaqaanno iyo shaqaalaha (da'doodu u dhaxayso 18 ilaa 35 kuwaas oo doonaya inay, in muddo ah, qaaaan tababar iyo indha indheyn lagu dhex sameeyo machadyada takhasuska ee wershadaha, beeraha iyo farsamada, iyo kuwo lagu dhex sameynaayo hayado guud ama gaar;

6. Si kastaba ha noqotee, inta lagu gudajiro sanadaha ugu horreeya ee hirgelinta nidaamkan waxaa mudnaanta iska leh ardayda horey u bilaabay koorasyada caadiga ah ee daraasadda (waxbarashada) Itaaliya gudaheeda, sì ayagaas loogu suurtogeliyo in ay waxbarashada dhammeystiraan ilaa inta ay ka qaadanayaan shahaadada jaamacadeed.

Sì kastaba ha noqotee, caadiyan deeqda waxbarasho looma cusbooneysiin karo ardayda aan koorisyada ka dib-dhacay ama kuwa aan, sannad dugsiyeedkii hore, natiijo fiican ka keenin waxbarashada.

7. Lacagta sanadlaha ah ee deeq-waxbarasho kasta waxaa goyn doona Guddiga iyadoo la tixgalinayo wixii baahi dugsiyeed ah iyo dabeecadda mudada koorisyada la doortay. Si kasta ha noqotee, si kastaba ha noqotee, lacagtaas kama badan karto wadarta hal milyan oo Liirada talyaaniga ah, iyada oo ay ku jiraan dhammaan kharashyada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn, oo ay ku jiraan kuwa safarrada,ee sii-socod iyo soo.socod;

8. Dhamaadka sanad kasta, Guddigu wuxuu baarayaa xisaab-xirka maamulka sanduuqa loogu talagalay deeqaha waxbarasho, asaga oo wareejinya, miisaaniyaddad qoondaha sannadka xiga (dambe), wixii soo haray (oo siyaado iyo nusqaan ah).

Rooma, Abriil 26, 1961.